



# **Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha**

# TUSMADA

Fariin ka socota Xubingole Anna Wright, Xubin Dawlida Camden ee u xilsaaran Caafimaadka, Wanaaggqabka iyo Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka .....	4
Fariin ka socota daryeeleyaal aanan mushaar lahayn .....	5
Akhrinta Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha.....	6
<b>Qaybta 1 - Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha.....</b>	<b>8</b>
Sida loo xusay Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha.....	8
<b>Qaybta I – Mabaadii'da Taageeridda Daryeeleyaasha .....</b>	<b>9</b>
Mabda'a 1: Isku aqoonsashada daryeele ayaa ah tallaabo daruuri u ah helitaanka taageerada .....	9
Mabda'a 2: Daryeeliddu waxay asal ahaan ku xiran tahay xiriir qof lala leeyahay .....	9
Mabda'a 3: Daryeeluhu waa qof shakhsii ah oo leh baahiyo iyo xaalad iyaga gaar u ah.....	9
Mabda'a 4: Masuuliyadaha daryeelku waxay u baahan yihiin waqtii iyo tamar .....	9
Mabda'a 5: Adeegyada isku xiran ayaa daruuri u ah daryeeleyaasha .....	9
<b>Qaybta II – Meelaha Mudnaanta u leh Waxqabadka .....</b>	<b>10</b>
Wadaxiriirka .....	10
Macluumaadka iyo Talada .....	11
Taageerada Caafimaadka Maskaxda .....	12
Wadahadallada Daryelaha (qiimaynada) .....	13
Qorshaynta Xaaladda Degdegga iyo Mustaqbalka .....	13
Caafimaadka iyo Ka Sii-daynta Isbitaalka .....	14
Taageerada Daryeeleyaasha Da'da yar (Young Adult Carers) (YAC) .....	14
Nasashooyinka Daryelaha .....	15
Furnaanta/Helitaanka .....	15
Taageerada Maaliyadeed iyo Sharciyed .....	16
Shaqada, Waxbarashada, iyo Tababbarka .....	16

<b>Qaybta III – Raadraacaha Waxqabadka .....</b>	17
Waxqabadyada Hadda.....	17
Horumarka Ilaa Iminka.....	22
<b>Qaybta 2 - Carers in Camden (Daryeeleyaasha jooga Camden) .....</b>	<b>24</b>
Ciddee ayaa ah daryele (carer)? .....	24
Carers in Camden (Daryeeleyaasha jooga Camden).....	25
Waajibaadyada sharchiyeed ee lagu taageero daryeeleyaasha .....	29
Sida loo soo saaray qorshaha waxqabadka .....	30
Cidda gargaar ka bixisay soo saarista qorshaha waxqabadka.....	31
Maxaa xiga – Guddiga Iskaashiga Daryeeleyaasha Xaafadda.....	33
Sidee ayaan u ogaan doonaa in uu isbeddel yimid? .....	33
Taageerada loogu talagalay daryeeleyaasha jooga Camden.....	35



## **Farriin ka socota Xubingole Anna Wright, Xubin Dawlida Camden ee u xilsaaran Caafimaadka, Wanaagqabka iyo Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka**

Daryeeleyaashu waa halyay aanan la ammaan oo ku jira bulshooyinkeena. Maalin walba dad ayaa iska xilsaara masuulyado daryeel oo cusub, iyagoo kaalin daruuri ah ka fuliya qoysaska iyo bulshooyinkooda kale, iyagoo taageero, daryeel iyo caawimo ku aadan hawlahaa maalinla ah siiya dadka haddii aan la caawin la rafaadi doona in ay keligood is dabbaraan. Cilmibaaris ay samaysay hay'adda Carers UK ayaa lagu ogaaday in daryeeleyaasha aanan mushaarka lahayn ee jooga England iyo Wales ay ku daraan £445 malyuun maalintii dhaqaalaha taasoo ah qiyas ahaan £162 bilyan sanadkii. Qiimaha daryeelka aanan mushaarka lahayn wuxuu u dhigmaa NHS labaad oo ka jira England iyo Wales!

Laakiin yaa daryeela daryeeleyaasha? Waxaa jirta cilmibaaris badan oo sanado badan soo socotay oo u doodaysa in daryeeleyaashu ay taageero u baahan yihiin. Waaan og nahay in daryeeleyaasha uu si xun u saameeyey cudurkii safmarka ahaa, in daryeeleyaashu ay la kulmaan go'doon bulsho iyo keli ahaan, in daryeeleyaashu ay badi dayacaan caafimaadkooda iyo wanaagqabkooda inta ay u heellan yihiin daryeelidda baahiyaha dadka kale. Waaan sidoo kale og nahay in qaar ka mid ah sinnaan la'aamaha ka jira shacabka Camden oo dhan ay sidoo kale uga jiraan daryeeleyaasha dhexdooda. Warbixinta Dhisidda Aasaasaha Siman (Building Equal Foundations Report) ee Camden, taasoo lagu eegay saamaynta aan is leekayn ee cudurka Covid-19 uu ku yeeshay bulshooyinka Madowga, Aasiyanka, iyo jinsiyadaha kale ah ee Camden ayaa lagu helay caddayn tilmaamaysa in daryeeleyaasha ka soo jeeda qaar ka mid ah asallada Madowga, Aasiyanka, iyo jinsiyadaha kale ay ka filasho yar tahay in ay taageero ku helaan dariiqyada caadiga ah. Saamayntan oo la socota mudda ka timid shiddada kharashka nolosha ayaa weli raad in badan waara ku leh.

Xeeladda Camden ee ku aadan nolosha iyo gabobidda wanaagsan ee Camden gudaheeda waxaa lagu magacaabaa Supporting People, Connecting Communities (Taageeridda Dadka, Xiriirinta Bulshooyinka) waxaana lagu xusay mudnaanta in la hubiyo in daryeele walba uu dareemo in la qiimeeyo oo la taageero. Fikradda Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaashu waxay ka dhalatay damaca ah in ballanqaadkan laga dhabeeyo.

Qorshahan Waxqabadka Daryeeleyaashu waa mid gaar ah maxaa yeelay waxaa soo saaray daryeeleyaasha waxaana loogu talagalay daryeeleyaasha. Waaan og nahay in adeegyada ay hagaan lalana habeeyo dadka taageerada hela ay si ka fiican ugu habboonaan doonaan baahiyaha dadka loogu talagalay in loogu adeego. Mida ugu muhiimsan, qorshaha waxaa lagu qabeeyey waxqabadyo khaas ah oo ujeeddadoo ay tahay, tusaale ahaan, in taageero waqtii hore loogu deeqo daryeeleyaasha ka hor inta aanay gaarin heir shiddo taasoo iyaga u suurtogelisa in ay sii wadaan kaalimahooda daryeelka waqtiga ugu badan ee suurogalka ah. Daryeeleyaasha ayaa sidoo kale si cad u sheegay in aan u baahannahay adeegyo wada shaqeeya, oo si ka fiican hawsha uga qaybgeliya daryeeleyaasha oo ay u arkaan shuraako qiime leh.

Camden waxaa saaran masuulyadda in ay hormuud u noqoto oo ay u dooddo dhammaan daryeeleyaasha iyo in ay daryeeleyaal dheeraad ah la xiriiriso taageerada mar kastoo suurogal ah. Shaqada aan la qabannay daryeeleyaasha si aan u soo saarno qorshahan waxaan ku aaminsan nahay in aan xoojin karno taageerada diyaarka ah oo aan caddaaladda u kordhin karno oo aan u furi karno dadkoo dhan si ay u heli karaan. Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha waxaa lagu rabaa in si duwan wax loogu sameeyo, si daryeeleyaashu aanay soo laabmin iyagoo sheegaya in aanay xaaladdu is beddelin.

Daryeele ayaa kulan koox diiradsaris ku sheegay in ay rabaan in la "Arko, la maglo oo lagu maqsuudo." Annagu uma malayno in ay tani tahay wax aanan la samayn karin, waxaanan rabnaa in aan dhammaan daryeeleyaasha Camden idinka mahadcelinno dhammaan waxa aad qabataan.



**Xubingole Anna Wright, Xubin Dawlida  
Camden ee u xilsaaran Caafimaadka,  
Wanaagqabka iyo Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka**

## **Farriin ka socota daryeeleyaal aanan mushaar lahayn**

### **"Waxaan rabnaa in uu qof dhaho: waan maqlay waxa aad sheegtay."**

Way adkaan kartaa in la isku aqoonsado ama la isku tilmaamo daryeele. Waxaan rabnaa in la aqoonsado in wax cajib ah aan samayno, waana in aan ku sharaf qabno!

Daryeele ahaantu way adkaan kartaa, waqtii ayay qaadan kartaa waxayna beddeli kartaa nolosha. Waxay noqon kartaa kelinimo iyo dhibaato. Caadi ahaan ma aha kaalin aan codsannay. Waxaan bixinnaa dadaal aad u badan laakiin faa'iido badan ayay taasi keeni kartaa marka aan aragno in qofka aan taageerino uu ku nool yahay nolosha ugu fiican ee suurogal u ah. Way fududdahay in naftaada aad ilowdo marka aad qof kale horta ka fikirayso. Waxaan dareemi karnaa in aan shaqada u heegan nahay xataa haddii aan isku dayno in aan xuduud dejinno. Waan soconnaa maalinba maalinta ku xigta maxaa yeelay dadka aan daryeelno ayaa taageeradayada u baahan. Waaxaan sidaas u samayn karnaa jeceyl, daacadnimo, anshax, masuuliyad ama maadaama aan u aragno in aanay cid kale joogin oo ay iyagu annaga nagu tiirsan yihiin. Waxaan ku fiican nahay in aan maalin kaste sideeda u raacno.

Waa in nala qiimeeyo. Waxaan khibrad badan u leenahay in aan adeegyada isticmaalno oo aan la hadalno. Waxaan badi nahay xiriirka u dhixeyya adeegyada. Waxaan rabnaa in aan wadaagno aqoontayada waxaanan rabnaa in codkayaga la maqlo! Taageerada dadka isku faca ah ayaa waxtar yeelan karta, way na caawin kartaa haddii aan taageeradaas helno oo aan la hadalno daryeeleyaal kale. Annaguba taageero ayaan u baahan nahay.

### **"Marka aad meel wacdo, waxaad rabtaa inaad dareento in hab lagu siinayo oo lagu soo dhawaynayo halkii aad ka dareemi lahayd in dib laguu riixayo."**

Qorshahan waxqabadka ayaa bilow ah. Waxaa lala soo saaray tirada ugu badan ee daryeeleyaasha jooga Camden ee ay noo suurtogashay in aan la hadalno.

Waxaan rabnaa in daryeeleyaal dheeraad ahi ay aqoonsadaan in ay daryeeleyaal yihiin. Waxaan rabnaa in daryeeleyaal dheeraad ahi ay ogaadaan in aanay keligood ahayn. Waxaan rabnaa in aan bulsho ahaan kobacno annagoo qofba qofka kale taageeraya. Waxaan rabnaa in daryeelle walba uu fahmo taageerada ay xaq u leeyihii. Marka aan adeeg la xiriirno waa in aan ka helno waayo ama dhacdo fiican. Marka aakhirka la gaaro, waqtii iyo lacag badan ayaan adeegyada ugu reebnaa waxa aan samayno.

Ku soo dhawow Qorshahayaga Waxqabadka  
Daryeeleyaasha!



## Akhrinta Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha

Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaashu waa ballanqaad ah in daryeeleyaasha la aqoonsado oo si ka fiican loo taageero. Waa qorshe lagu suurtogelinayo in adeegyada oo dhani ay wada shaqeeyaan si ay u daboolaan baahiyaha daryeeleyaasha.

Qorshaha waxqabadka waxaa loogu talagalay daryeeleyaasha aanan mushaarlahayn, ama aanan rasmi ahayn. Kuwani waa daryeeleyaasha 18 jirka ah ama ka weyn ee daryeel siiya dad 16 jir ah ama ka weyn,\* ee aanan lacag ka helin adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulshada, ama qofka ay taageeraan, taasoo laga siiyo kaalintooda daryeelka.

Tallaabo walba oo ku jirta qorshahan waxqabadka waxaa lala soo saaray daryeeleyaal aanan mushaarka lahayn oo ka soo jeeda bulshooyinkeena kaladuwan. Waxay tani ka turjumaysaa codka daryeeleyaasha, waayahooda iyo aqoontooda. Waxay qaadatay waqtidheer si bartan loo soo gaaro. Macluumaad badan ayaa ku jira dukumeentigan. Waxaa muhiim loo maleeyey in aanan la muujin oo keliya waxqabadyada ku jira qorshahan, laakiin in sidoo kale la sharraxo sida loo soo saaray qorshaha. Meelaha qaarkood ayaa laga yaabaa in ay adiga kaaga dan badan yihiin meelo kale. Si adiga laguugu fududeeyo, qorshaha waxqabadka waxaa loo kala saaray labo qaybood:

### 1) Qorshaha Waxqabadka

### 2) Carers in Camden (Daryeeleyaasha jooga Camden)

**Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha** waxaa loo habeeyo in uu dhaqdhaqaaq yeesho wuuna is beddeli doonaa waqtii ka dib. Qaybta Qorshaha Waxqabadka dhixdeeda, waxaa lagu muujiyey mabaadii'da wadajir loo soo saaray ee habboon in ay bartamaha ugu jiraan sida habboon in adeegyada oo dhan loogu xiriiriyo daryeeleyaasha (Dhinaca I). Daryeeleyaashu waxay sidoo kale tilmaameen meelaha mudnaanta leh ee adeegyada oo dhan, laakiin gaar ahaan kuwa ku lug leh caafimaadka iyo daryeelka bulsheed, ay ku samayn karaan isbeddello si loogu faa'iideeyo daryeeleyaasha (Dhinaca II). Waxaa jira raadraacaha waxqabadka (Dhinaca III) kaasoo muujinaya waxqabadyada la tilmaamay ama la soo ogaaday ee habboon in marka hore la eego, iyo horumarka ilaa iminka la gaaray. Meelaha mudnaanta leh iyo raadraacaha ayaa la cusboonaysiin doonaa marka hore loogu socdo qorshaha waxqabadka, waxyaboo la fuliyo ee meelaha diiradsaaristu ay is beddelaan, iyadoo ay hoggaamiyaan guddiga iskaashiga daryeeleyaasha ee cusub.

Waxaa tan dhammaanteed hoggaamin doona daryeeleyaasha aanan mushaarka lahayn. Gaaritaanka iyo taageeridda daryeeleyaal dheeraad ah ayaa muhiim u ah wax walboo aan wadno in aan samayno.



**Carers in Camden (Daryeeleyaasha jooga Camden)** ayaa haysa macluumaadka lagu taageerayo qroshaha waxqabadka. Qaybtan waxaa lagaga hadlayaa qeexitaanka ama sharaxaadda daryeelaha aanan musharka lahayn; waxaa lagu muujinayaa xog ku saabsan daryeeleyaasha jooga Camden waxaana lagu xusayaa xuquuqaha daryeeleyaasha. Qaypta waxaa lagu qeexayaa sida loo soo saaray qorshaha waxqabadka, iyo cidda lala soo saaray; sida loo cabbiri doono horumarka laga gaaro qorshaha waxqabadka iyo qorshooyinka u yaalla guddiga iskaashiga daryeeleyaasha.

Sida loola xiriilo taageerada, haddii aad tahay daryeele aanan mushaar lahayn, ayaa sidoo kale laga heli karaa dhammaadka qaybtan.

Haddii aad doorbidayo in aad aragto nuskhadda internetka ee qorshahan, waxaa jirta barta internetka ee loogu talagalay qorshaha waxqabadka: <https://carersactionplan.camden.gov.uk>

\*Xeeladda daryeeleyaasha da'ada yar ayaa la cusboonaysiinayaa waxaana la higsanayaa in qorshahan waxqabadku uu la xiriiri doono xeeeladda daryeeleyaasha da' yar ee cusub inta la horumarinayo.



# **Qaybta 1 - Qorshaha**

## **Waxqabadka Daryeeleyaasha**

### **Sida loo xusay Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha**

Mawduucyada waxaa laga soo ogAADAY wAXA muhiim u ah daryeeleyaasha. Waxaa kuwan loo kala faahfaahiyey shan mabda'a oo muhiim ah, oo lagu tiirinayo taageerada loogu talagalay daryeeleyaasha, iyo weliba meelaha mudnaanta u leh waxqabadka. Hadallada toos looga soo qaaday daryeeleyaasha ayaa lagu daray dhammaan qorshaha waxqabadka. Qorshahan waxqabadku wuu is beddeli doonaa inta aan wadajir hore ugu soconno si aan mudnaanaha daryeeleyaasha uga fulinno Camden.

**Qaybta I** waxaa lagu qeexay **mabaadii'da taageeridda daryeeleyaasha**. Kuwani waa aasaasi waana in lagu tiiriyo wax walboo aan samayno. Waxaa loo arkaa in aanay kuwani is beddeli doonin. Mabaadii'du waa:

- Isku aqoonsashada daryeele ayaa ah tallaabo daruuri u ah helitaanka taageerada
- Daryeeliddu waxay asal ahaan ku xiran tahay xiriir qof lala leeyahay
- Daryeeluhu waa qof shakhsii ah oo leh baahiyo iyo xaaland iyaga u gaar ah
- Masuuliyadaha daryeelku waxay u baahan yihiin waqtii iyo tamar
- Adeegyada isku xiran ayaa daruuri u ah daryeeleyaasha

**Qaybta II** waa **meelaha mudnaanta leh** ee ay daryeeleyaashu sheegeen in ay habboon tahay in aan diiradda saarno. Marka macluumaad dheeraad ah la helo, ee la sii wado shaqada ay ka qaybgalaan daryeeleyaashu ee lagu fulinayo qorshaha, Qaybta II ayaa la cusboonaysiin doonaa si loogu matalo fikradaha ama ra'yiga iyo waayaha tirada daryeeleyaasha ugu badan ee suurogalka ah. Waxyaabaha mudnaanta leh waa:

- Wadaxiriirk
- Macluumaadka iyo Talada
- Taageerada Caafimaadka Maskaxda
- Wadahadallada Daryeelah (qiimaynada)
- Qorshaynta Xaaladda Degdegga / Mustaqbalka
- Caafimaadka iyo Ka Sii-daynta Isbitaalka
- Taageerada Daryeeleyaasha Da'da yar (Young Adult Carers) (YAC)
- Nasashooyinka Daryeeleyaasha
- Furnaanta/Helitaanka
- Taageerada Maaliyadeed iyo Sharciyed
- Shaqada, Waxbarashada iyo Tababbarka

**Raadracaha Waxqabadka** ee ku jira **Qaybta III** ayaa lagu faahfaahin doonaa tallaabooyinka lagu gaarayo meel walbo wax laga qabanayo. Tani way is beddeli doontaa inta aan la shaqaynayno daryeeleyaasha, waaxda caafimaadka, daryeelka bulshada, iyo ururrada bulshada si aan u helno xalal waxtar leh. Marka la dejiyo hababka hore loogu socon karo, waqtiyada lagu fulinayo ayaa loo qoondayn doonaa mid kastoo ka mid ah waxqabadyada. Raadraacaha waxaa sidoo kale ku jirta qayb loogu talagalay horumarka laga gaaray mudnaan kaste.

## **Qaybta I – Mabaadii'da Taageeridda Daryeeleyaasha**

Intii la soo saarayey qorshahan waxqabadka waxaa jawaabaha daryeeleyaasha ka soo baxay dhowr mawduuc oo aanan ka hadlayn meelo khaas ah oo wax laga qabanayo. Mawduucyadan ayaa lagu habeeyey mabaadii' lagu tiirin doono shaqada oo dhan si loo hubiyo in daryeeleyaasha la qiimeeyo oo la taageero.

### **Mabda'a 1: Isku aqoonsashada daryeele ayaa ah tallaabo daruuri u ah helitaanka taageerada**

Dadku waxay badanaa isku arkaan walaal, lammaane, waalid, ilme, saaxiib halka 'daryeele'. Waxay dad badan ku qaadan kartaa hal sano ilaa in ka badan saddex sano si ay u gartaan ama u aqoonsadaan in ay daryeeleyaal yihii, taasoo ka dhigan waqtii dheer oo aad heli weydo taageerada aad xaq u leedahay. Ka sokow isku dayidda in wacyi gelinta loo kordhiyo shacabka guud, waxaa la aqoonsaday in cudurka safmarku uu saamayn aanan is leekayn ku yeeshay kooxo badan oo faa'iido yar oo ay ka mid yihii daryeeleyaasha ka soo jeeda bulshooyinkayaga kaladuwani. Waxaa muhiim ah in adeegyadu ay iskood ugu dhaqaqaan in ay soo ogaadaan daryeeleyaasha si ay iyaga ula xiriiriyaan taageerada. Waxay tani sidoo kale ka dhigan tahay in dadka lala shaqeeyo si loo fahmo oo wax looga qabto carqaladaha hor yaalla isku aqoonsashada daryeele.

### **Mabda'a 2: Daryeeliddu waxay asal ahaan ku xiran tahay xiriir qof lala leeyahay**

Dhanka camaliga ah, taageerada la siiyo daryeeleyaashu waxay ku xiran tahay habka loo daboolo daryeelka iyo baahiyaha taageerada ee qofka/dadka ay daryeelaan. Labada midba gooni looma eegi karo oo go'aannada ku saabsan qofka la daryeelo ayaa saameeya daryeelhooda. Waxaa muhiim ah in daryeeleyaasha laga qaybgeliyo, laga wargeliyo, oo loo tixgeliyo go'aannada la gaaro, iyagoo barbar socda xirfadleyaasha ama takhaatiirta caafimaadka iyo daryeelka iyo qofka laftigooda.

Taageerada diiradda lagu saaro ka hortaggu uma faa'iidayso oo keliya qofka la daryeelo laakiin weliba daryeeleyaasha.

### **Mabda'a 3: Daryeeluhu waa qof shakhsii ah oo leh baahiyio iyo xaalad iyaga gaar u ah**

Inkastoo daryeeliddu lagu qeexo xaaladda xiriirkha, haddana ma aha dhinaca keliya ee uu leeyahay aqoonsiga qofku. Isla sida ay u habboon tahay in daryeelka iyo taageerada loogu talagalay shakhsiyadka lagu matalo dookhyadooda ama doorbidyadooda iyo anshaxooda, daryeeleyaashu waxay u baahan yihii xulashooyin iyo taageero matalaya aqoonsigooda shakhsii ahaaneed, xaaladdooda dhaqameed, iyo duruufahooda nolosha.

Daryeeleyaashu waxay bixiyaan taageero aan la qiyaasi karin, haddana waxay tani badi xadidaysaa kartida ay u leeyihiin in ay naftooda wax u qabtaan. Daryeeleyaashu waxay sheegeen inkastoo ay daryeeliddu himilo siiso, haddana waxay ka dhignaan kartaa in rajoooyinkooda iyo higsiyadooda gaarka ah ay hakiyaan – waqtii aanan xad lahayn. Waxay tani keeni kartaa xadaymo saaran baaridda hammadyadooda shakhsii ahaaneed ee firaqaqada, waxbarashada iyo shaqada. Waxaa daruuri ah in baahiyaha daryeeleyaasha la dhegeysto, mudnaan la siiyo, oo loo doodo, xataa aqoonsashada kaalinta daryeeleyaasha oo lagu aqoonsado dejinta siyaasadda iyo adeegga.

### **Mabda'a 4: Masuuliyadaha daryelku waxay u baahan yihii waqtii iyo tamar**

Helitaanka nafaas shucuureed ama waqtii camali ah inta lagu jiro kaalinta daryeelka ayaa carqalad u noqon karta helitaanka taageerada ay daryeeleyaashu u baahan yihii, iyagoo ugu baahan naftooda iyo dadka ay daryeelaan. Daryeeleyaashu waxay noo sheegeen in adkaanshaha maskaxda iyo jirka loo baahan yahay si loo sameeyo waxa ay sameeyaa, laakiin badi daryeeleyaasha laftigooda ayaa caafimaad darnaan kara sababtoo ah saamaynta daryeelka. Sidaas darteed waxaa muhiim ah in macluumaadka iyo habsocodyada la kala caddeeyo oo la fududeeyo iyo in dabacsanaan laga muujiyo adeegyada iyo hay'adaha kale dheddooda. Daryeeleyaashu waxay rabaan in laga qayb geliyo horumarinta adeegga waxayna tani macnaha ugu badan u yeelataa marka ay ka qayb geli karaan shaqada hawlaha la taaban karo oo ay arki karaan natijjooyinka.

### **Mabda'a 5: Adeegyada isku xiran ayaa daruuri u ah daryeeleyaasha**

Adeegyada ku xiran fikradaha iyo ra'yicelinta daryeeleyaasha ayaa kaga fiican in ay fahmaan oo ay wax ka qabtaan caqabadaha lagala kulmo helitaanka taageerada. Marka adeegyadu ay iska kaashadaan shaqada si ay u wadaagaan fikradaha oo ay iskugu geeyaan khayraadka, si ka waxtar badan ayaa natijjooyin daryeeleyaasha looga heli karaa Camden oo dhan. Sulubidda habsocodyada iyo meesha oo laga saaro waxyaabaha lagu celceliyo ayaa daryeeleyaasha ka caawinaysa in ay si ka waxtar badan u dhix maaxaan taageerada diyaarka ah. Waxay tani weliba faa'iido u leedahay adeegyada, gaar ahaan marka la eego xuduudda hadda uga yaalla tirada la qaadi karo. Iskaashiyada lala galoo kooxaha bulshada ee hore ugu xiran daryeeleyaasha ayaa caawin kara in la xaqijiyo in macluumaadka dadka toos loola wadaago oo la adeegsado hab iyaga waxtar u leh. Adeegyada xeelad ku toosan xaafadda, bulshada, ka muujiya wadashaqaynta iyo fulinta hawlgallada intasuurogalka ah.

## Qaybta II – Meelaha Mudnaanta u leh Waxqabadka

Meelaha mudnaanta leh ee Wadaxiriirka, Macluumaadka & Talada iyo Caafimaadka Maskaxda ayay kooxaha diiradsaarista daryeeleyaashu tilmaameen in ay yihiin kuwa loo baahan yahay in horta laga shaqeeyo. Waxqabadyada ku jira raadraacaha ee Qaybta III ayaa matalaya in ay kuwani yihiin meelaha hadda diiradda la saarayo.

### Wadaxiriirka

**“Marka aad daryeеле tahay, waa in aad adeegyo badan la macaamisho. Badi waxaa jira gargaар, laakiin way adag tahay in la helo ururka ama waaxda saxda ah.”**

#### Waxa muhiim u ah daryeeleyaasha:

- Marin cad oo loogu talagalay daryeeleyaasha si ay ula xiriiraan ama ula hadlaan adeegyada kaasoo is leeg oo naxariis leh.
- Daryelaha oo uusan qofba qofka kale u gudbinin.
- Jiritaanka qof hormuud u noqda oo u dooda daryeeleyaasha, oo ka war haya daryeeleyaasha, oo ku jira adeegyada.
- Adeegyo dib ula soo xiriira daryeeleyaasha marka ay ballanqaadaan in ay sidaas samayn doonaan.
- Guddiga Iskaashiga Daryeeleyaasha oo adeegyada lagula xisaabtami karo.
- Adeegyo turjumaad oo si ballaaran loo helo oo si waxtar leh u gudbiya farriinta ama hadalka uu qofku isku dayayo in uu sheego.
- Luuqad la wanaajiyay oo ay adeegyadu isticmaalaan si ay u qeexaan ama u sharraxaan waxa ay ka dhigan tahay ahaanshaha daryeеле si dad dheeraad ahi ay tan isku aqoonsan karaan.
- Macluumaad lagu akhrin karo telefoonka gacanta.
- Adeegyo isticmaala aaladaha baraha bulshada si ay u gaaraan dad dheeraad ah.
- Wadaxiriir astaysan si loogu matalo kaladuwanaanta baahiyaha iyo aqoonsiyada daryeeleyaasha. Tusaale ahaan, daryeeleyaasha labka ah ayaa soo sheegay in ay badi dadka kula xiriiraan habab kaladuwaa oo ay ka filasho yar tahay in ay gargaар codsadaan.



## Macluumaadka iyo Talada

**"Anigu waxaan rabaa shabakad taageero oo si ka fiican u qaabaysan oo leh tilmaamis waxtar leh. Waxaan tagaa goobooyin aanan dhammaanayn oo aan lataliyeyaa kala qaybo laakiin waxaan ku dambeeyaa in ay weli isla carqalaihii hore iga hor yaallaan gargaarka aan iskay hore uga helay internetka."**

### Waxa muhiim u ah daryeeleyaasha:

- Macluumaadka iyo talada oo lagu helo xaalad taageero leh, macne leh, oo shakhsii ah.
- Toos ula hadlidda dadka fududayn kara fahanka oo loo maro shabakado taageero iyo munaasabado tababbar maqal iyo muuqaal.
- Macluumaadka oo sax ah oo ah kuwii ugu dambeeyey, iyadoo si cad loo sheego taageerada diyaarka ah iyo shuruudaha u qalmista.
- Dhisidda meel ama bannaan gaar ah, sida bog intarnet, halkaasoo macluumaadka iyo talada daryeelaha laga heli karo.
- Macluumaadka oo ku diyaar ah luqadda hooyo ee qofka, iyo la shaqaynta hay'ado takhasus leh oo dhaqanka khaas u ah si loogu xayaysiyo oo loogu qaybiyo macluumaadka daryeeleyaasha.
- Macluumaadka oo lagu helo qaabab kaladuwani oo dhijitaal iyo daabacaad ah; daryeeleyaal badan ayaa labadaas kala doorbida.
- Ogaanshaha halka uu daryeeluhi taageero u doonan karo ee aanan ahayn adeegyada rasmiga ah.
- Fahmidda cidda caawin karta u doodista daryeeleyaasha iyo sida adeegyadan loo heli karo.
- Fahmidda xuquuqda iyo waxyaabaha la heli karo daryeele ahaan oo ay ka mid tahay taageerada ka diyaar ah waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka, Caafimaadka, Guryeynta, loo-shaqeeyeyaasha, iyo wixii la xiriira dheefaha ama lacagaha cayrta, deeqaha, iyo haajiraadda.
- Goobta shaqada oo laga wacyi geliyo daryeeleyaasha.
- Wax dheeraad ah oo laga barto mawduucyada daryeelka caafimaadka sida asasaqa (dementia), maangoonida (autism), naafada, cuntada caafimaadka leh, iyo wanaaggabka.
- Xayaysiinta dhereaadka ah ee barnaamijyada kaarka sicir dhimista ee hadda diyaar u ah daryeeleyaasha, iyo taageerada si loogu doodo kabitaannada, sida, rukumashooyinka jimicsiga, fowsharrada ama tigidhada lacagta ee daryeelka indhaha, daryeelka ilkaha.
- Xaqijinta in dhammaan adeegyadu og yihiin taageerada diyaar u ah daryeeleyaasha oo ay si firfircoona daryeeleyaasha ugu gudbiyaan taageerada.
- Bixinta macluumaad googo'an oo la soo koobay si loogu taageero hababka kaladuwani ee ay dadku u qaataan macluumaadka.



## Taageerada Caafimaadka Maskaxda

**“Caafimaadka maskaxdu gooni uma taagna, wuxuu barbar socon karaa waxyaabo iyo xaalado caafimaad kale, wuxuuna dhalin karaa baahiyoo daryeel”**

Mudnaantani waxay la xiriirtaa taageeridda wanaaggabka maskaxda ee daryeeleyaasha iyo sidoo kale adeegyada caafimaadka maskaxda.

### Waxa muhiim u ah daryeeleyaasha:

- Aqoon ka fiican oo laga haysto halka laga helo taageerada ugu horraysa, taageerada laga helo cudurka la sheego, iyo halka laga helo taageerada joogtada ah.
- Suurogalka in ay jirto hal meel oo lala xiriiro iyo jiritaanka qorshe la wadaago oo lagu taageero dadka aan daryeelno.
- Xaqijinta in daryeeleyaasha la dhegeysto oo hawsha laga qaybgeliyo marka la qorshaynayo daryeelka iyo taageerada.
- Daryeeleyaasha oo loogu baaqo qiimaynta daryeela.
- Taageero joogto ah oo laga bixiyo wanaaggabka, sida latalin ama caqlicelin qiime jaban ama bilaash ah, baaritaanka badqabka, waxqabadyo lagu xoojiyo xiriirka bulsheed iyo taageerada faca.
- Taageerada caafimaadka maskaxda ee sidoo kale ka turjuma aqoonsiyada iyo baahiyaha dhaqameed ee kaladuwan, tusaale ahaan, kooxo takhasus leh oo loogu talagalay ragga, daryeeleyaasha madow, waalidiinta keli ah, haweenka iyo dadka ah LGBTQ+.
- Taageerada dadka isku faca ah si loogu bixiyo xiriir iyo saaxiibtinimo.
- Helitaanka meel ama nafaas nabad ah oo lagula kulmo daryeeleyaal kale, gaar ahaan marka qofka la daryeelo uu shiddo ku jiro.
- Taageero kahortag ah oo camali ah oo ka baxsan adeegyada qaunuuniga ah, halkaasoo daryeeleyaasha, iyo dadka ay daryeelaan, ay ka heli karaan gargaar iyo waxqabadyo dheeraad ah.
- Faham dheeraad ah oo laga helo deeqda nasinta, oo ay ka mid yihiin meelo ama bannaano nabad ah.
- Taageero dheeraad ah oo caafimaadka maskaxda laga siyo qoysaska daryeela dad maangooni leh, iyo aqoonsashada caqabadaha shucuureed ee laga yaabo in ay daryeeleyaashu qabaan.
- Ogaanshaha taageerada lagu deeqo marka loo kala guurayo adeegyada Carruurta ilaa kuwa Qaangaarka.
- Adeegyo isku xiran oo lagu taageero caafimaadka maskaxda, caafimaadka jirka, iyo adeegyada kale sida isticmaalka xun ee maandooriyaha, haddii qofku u baahan yahay in uu taageero ka helo adeegyo badan.
- Hormuudyada caafimaadka maskaxda ee ku jira ururrada, dadka oo loo tababbaro oo laga wargeliyo marka taageerada loo baahan yahay.
- Dadka iyo adeegyada oo dhammaantood iska xilsaara in ay yareeyaan dhaleecada caafimaadka maskaxda.



## **Wadahadallada Daryeelaha (qiimaynada)**

**"Hawsha Wadahadalka Daryeeluhu waa in la isku dayo in daryeelaha diiradda loo saaro oo lagu taxallujiyo naftooda."**

### **Waxa muhiim u ah daryeeleyaasha:**

- Wacyigelinta Wadahadallada Daryeelaha, si daryeeleyaashu ay u ogaadaan halka ay ka codsan karaan.
- Helitaanka Wadahadalka Daryeelaha (Carer Conversation) ee joogtada ah (dib loo eego 12kii billoodba mar), iyo helitaanka taageero aanan rasmi ahayn iyo soo hubinnada khuseeya Wadahadallada Daryeelaha.
- Si ka fiican oo loo helo taageerada loogu talagalay daryeeleyaasha carruurta galaya xaalada qaangaarnimada.
- Helitaanka macluumaad ku saabsan sida ugu fiican ee la iskugu diyaariyo Wadahadalka Daryeelaha.
- Wadahadallo matalaya muuqaalka guud ee kaalinta daryelka qofka oo ay ka mid tahay haddii ay daryeelaan dad badan, ama marka shabakad ka ballaaran oo ka kooban xiriirro bulsheed iyo qoysku ay daryel siiyan hal qof.
- Adeegsiga xirfadda iyo fahanka dhaqameed marka la bixinayo Wadahadallada Daryeelaha iyo ogaanshaha marka qof uu ka faa'iido heli karo Wadahadalka Daryeeleyaasha.
- Waqtii lagu qaato dhagaysiga saamaynta kaalinta daryelka. Wadahadalka waa in diiradda lagu saaro dareyeelaha.
- Macluumaad uu qofka Wadahadalka Daryeelaha qabanaya ka bixiyo dhammaan fursadaha taageerada diyaarka ah, halkii uu daryeluhu ka sheegi lahaa taageerada uu u baahan yahay marka aanay garanayn waxa suurogal ah.
- Ogaanshaha taageerada kale ee diyaarka ah waqtiga wadahadal la sugayo.
- Xataa haddii daryeluhu uu diido wadahadalka daryeelaha, waxaa weli iyaga loo diiwaangeli karaa daryeеле ahaan.

## **Qorshaynta Xaaladda Degdegga iyo Mustaqbalka**

**"Waxay ujeeddadu tahay in ay maskaxdu iigu degto in iyaga weli la daryeli doono haddii uu wax aniga igu dhaco."**

### **Waxa muhiim u ah daryeeleyaasha:**

- Dareemidda badbaado dheeraad ah iyadoo la og yahay in uu jiro qorshe loogu talagalay qofka ay daryeelaan, haddii ay xaalad degdeg ahi timaaddo. Waxaa tan ka mid ah dad kastoo daryeel bixin kara marka ay xaalad degdeg ahi jirto, waxaana arrintan lagu xusayaa nidaamyada maamulka diiwaannada ee ay adeegyadu isticmaalaan.
- Haysashada nidaam hore loogu heshiiyey, oo la isku hallayn karo, si loo hirgeliyo qorshaha beddelka ah haddii ay dhacdo in ay xaalad degdeg ahi timaaddo (adeegyada isku xiran).
- Nidaam lagu aqoonsado in aad tahay daryeele haddii ay xaalad degdeg ahi timaaddo tusaale ahaan, haysashada kaarka aqoonsiga daryeelaha.
- Marka ay daryeeleyaashu gabooaan ama bukoodaan, lahaanshaha qorshaha 'dhammaadka nolosha'. Markaa, qorshe ayaa u diyaar ah qofka ay daryeelaan, taasoo ay ka mid tahay guryeynta, haddii daryeluhu geeriyyodo.
- Taageero camali ah iyo shucuureed oo laga bixiyo qorshaynta dhammaadka nolosha, oo ay ka mid yihiin talada maaliyadeed, qareenimada iyo hagistu.
- Talo iyo hagis loogu talagalay marka daryeluhu uusan joogin, oo ay ka mid yihiin xirfadaha lagu taageero nolosha madaxbannaan.

## **Caafimaadka iyo Ka Sii-daynta Isbitaalka**

**"Waxaan aqoon aad u badan u leenahay dadka aan daryeelnor."**

### **Waxa muhiim u ah daryeeleyaasha:**

- Carrab saarista dheeraadka ah ee caafimaadka iyo badqabka daryeeleyaasha, oo ay ka mid yihiin wacyigelinta dheeraadka ah ee caafimaadka
- iyo baaritaannada habnololeedku.
- Isbitaalka oo awooda in uu ogaado marka qofku uu hayo masuuliyado daryeel marka la keeno.
- Ka qaybgalka habsocodka ka sii-daynta isbitaalka iyo qorshaynta daryeelka. In la xaqijiyo in nidaamyo daryeel oo waara la dejijo iyo in fikrado la siiyo kooxaha caafimaadka/daryeelka bulsheed taasoo ku salaysan aqoonta ay qofka ka haystaan, iyo sida laga yaabo in ay baahiyahoodu isku beddeleen ka dib soo gelitaankii isbitaalka.
- Ka warhaynta masuuliyadahooda daryeele ka dib ka sii-daynta isbitaalka.
- Helitaanka guryeyn taageero leh oo loogu talagalay dadka qaangaarka ah ee isticmaala adeegyada caafimaadka maskaxda ka dib isbitaalka, waqtii gaaban iyo sidoo kale waqtii dheer.
- Suurogalnimada ah in la helo ballamaha dhakhtarka marka loo baahan yahay iyo helitaanka ballamo ka muddo dheer si loo tixgeliyo baahiyaha luqadda/wadaxiriirka.
- Adeegyada oo isticmaala fursadaha lagula xiriyo daryeeleyaasha, marrka ay xaadiris badnaadaan, si loo bixiyo macluumaad iyo talo, tusaale ahaan waadhyada isbitaallada.
- Helitaanka gaadiidka marka daryeeleyaasha iyo dadka ay daryeelaan ay ballamo leeyihiin.

## **Taageerada Daryeeleyaasha Da'da yar (Young Adult Carers) (YAC)**

**"Taageerada aan haysto, kuma dareemo in aan qarqayo, laakiin waa sida dabbaal."**

### **Waxa muhiim u ah daryeeleyaasha:**

- Aqoonsashada baahiyahooda daryeeleyaal da'a yar, iyo sida ay kuwani uga duwan yihiin daryeeleyaasha marxalado kale ka jooga nolosha.
- Taageero helidda marxaladaha kala-guurla oo ay ka mid tahay ka gudbitaanka daryeele da'a yar iyo u gudbitaanka daryeele qaangaar ah (18-25), iyo u kala guuridda daryeele qaangaar ah ilaa daryeele qof wayn ah (26+), oo ay ka mid yihiin qiimaynada daryeelahaa waqtiga kala-guurka.
- Aqoonsashada hore ee kaalintooda daryeeleyaal si taageerada loo bilaabi karo marka loo baahdo.
- Fursadaha shaqada, waxbarashada, iyo tababbarka.
- Taageerada caafimaadka maskaxda
- Macluumaadka iyo wadaxiriirka oo lagu bixiyo qaab waxtar u leh qofka da'da yar; oo ay ka mid tahay macluumaadka oo meel dhexe la dhigo ama lagu qoro hal meel ama xarun dhexaad, iyo kordhinta taageerada dijitalka iyo isticmaalka idaacadaha baraha bulsheed ee lagu deeqo.

## **Nasashooyinka Daryeelaha**

**"Waxaa fudud in la il duufo qaybaha noloshaada ee aad isku garanaysay. Anigu waxaan iminka arkaa qiimaha ay leedahay in la isku dayo in mar kale la taabto qaybahaas."**

### **Waxa muhiim u ah daryeeleyaasha:**

- Fursado loo helo waqtii aadan u baahnayn in aad ka fikirto kaalintaada iyo masuuliyadahaaga daryeelka, iyo ogaanshaha in qofka/dadka aad daryeesho ay waqtigaas nabad qabaan oo la taageerayo.
- Waqtii lagu bixiyo in lala xiriiro saaxiibbada, qaraabada, iyo/ama daryeeleyaal kale adigoo aadan ka walwalayn masuuliyadahaaga daryeelka.
- Waqtii aad ku bixiso in aad taabato ama ka shaqayso naftaada, danahaaga, iyo meelaha ama dhinacyada adiga kaa mid ah ee dhaafsan kaalintaada daryeele.
- Xirfadleyaasha ama dhakhaatiirta oo aqoonsada saamaynta daryeelidda oo si kale uga fikira hababka ay daryeeleyaasha ugu taageeraan in ay qaataan nasashooyin macne leh ama waxtar leh.
- Wacyi dheeraad ah oo laga helo adeegyada iyo waayaha daryeele u suurtogelin kara in ay nasasho ka qaataan kaalintooda daryeelka.
- Xayasiinta taageerada camaliga ah ee noocyoo badan ee daryeelahaa si nasin loo siiyo, xataa degaanka ama guriga.

## **Furnaanta/Helitaanka**

**"Nidaamka qayladahanta Careline ayuu Kawnsalka Camden na siiyey taasna in badan ayaan ku nasannay."**

### **Waxa muhiim u ah daryeeleyaasha:**

- Ogaanshaha, iyo helitaanka, qalabyada iyo hagaajisyada lagu hubiyo in guryaha la geli karo oo dadka lagu taageeri karo gurigooda dhexdiisa, oo ay ka mid yihiin adeegyada gacanyaruhu.
- Helitaanka dheeraadka ah ee darawallada naafada ee Camden si loogu adeego dadka aanan isticmaali karin gaadiidka nooca kale ah.
- Xaqijinta in adeegyada loogu talagalay daryeeleyaasha iyo dadka ay daryeelaan ay bixiyaan taageero loo joogo ama fool-ka-fool ah iyagoo si fiican ugu xiran gaadiidka si loo wanaajiyo wax helitaanka ama wax isticmaalka.
- Gargaar iyo wehelin loogu deeqo dadka la daryeelo; marka tani aanay daryeeleyaasha laftigooda suurogal u ahayn.
- Xaqijintain daryeeleyaashu ay heli karaan adeegyo qareenimo marka loo baahan yahay.

## Taageerada Maaliyadeed iyo Sharciyed

**"Waxa aan rabaa waa fasax iyo lacag hawlgab."**

### Waxa muhiim u ah daryeeleyaasha:

- Ogaanshaha dheefaha cayrta ee ay daryeeleyaashu xaq u leeyihiin.
- Talo laga bixiyo maaliyadda ama dhaqaalaha iyo dheefaha oo ku habboon khaasna u ah duruufaha shakhsiyeed.
- Kulannada dheefaha ee khaaska ah ee loogu talagalay daryeeleyaasha, halkaasoo ay kula hadli karaan lataliye.
- Aqoonsiga maaliyadeed ee kaalinta daryeelka oo lagu bixiyo sicir dhimisyo, oo ay ka mid tahay taageero laga bixiyo biilasha guriga iyo kharashaadka safarka, si wax looga qabto kharashka nolosha ee kordhaya.
- Daryeelka guriga ee qiimaha jaban si loogu suurtogeliyo nasashooyinka daryeelah.
- Helitaanka gargaarka maaliyadeed ee sharciga ee bilaashka ah ama qiimo yar.
- Wacyigelin dheeraad ah oo daryeeleyaasha laga siiyo waxyaabaha ay ka mid yihiin maxkamadda badbaadinta (court of protection) ama wakiilashada (deputyship) ee loogu talagalay arrimaha maaliyadeed.
- La xiriirinta iyo ka wacyigelinta deeqaha iyo barnaamijyada taageerada ee diyaarka ah ee ka caawin kara in ay maamulaan caafimaadka maaliyadeed.

### Shaqada, Waxbarashada, iyo Tababbarka

**"Anigu waxaan ka shaqeeyaa farshaxanka hal-abuurka, inkastoo ay in badan xaddidan tahay kartida aan u leeyahay in aan shaqeeyo waqtiga xaadirka ah sabab la xiriirta qiyaasta kaalintayda daryeelka, anigoo markaa iminka shaqada u arka nafis ama nasin halkii ay hore igu ahayd meel aan walbahaar ka qaado!"**

### Waxa muhiim u ah daryeeleyaasha:

- Taageero ka fiican oo goobaha shaqada lagu siiyo daryeeleyaasha iyo fahmidda masuuliyadahooda.
- Shaqo u dabacsan masuuliyadaha daryeelka.
- Tababbar ku saabsan sida loo isticmaalo tignolooyiyadda si daryeeleyaasha looga yareeyo ka baxsanaanta dijitalka.
- Daryeel qof kale bixiyo oo daryeeleyaasha u suurtogelin doona in ay shaqo galaan.
- Helitaanka waxbarasho iyo tababbar lagu taageero horumarka shakhsii ahaaneed iyo xirfadeed.
- Taabbar iyo wacyi gelin laga bixiyo dhammaan waaxyaha caafimaadka iyo daryeelka bulsheed. Isbedbeddel la'aanta si sheekada hal jeer oo keliya loo sheego.

### Qaybta III – Raadraacaha Waxqabadka

Daryeeleyaasha, iyo ururrada taageera daryeeleyaasha, ayaa tilmaamay mudnaanaha (qaybta II) iyo waxqabadyada lagu caawinayo in la fuliyo mudnaanahan. Tallaabooyinka lagu fulinayo waxqabadyada mudnaanta u leh daryeeleyaasha ee qaybta II ayaa waqtii ka dib is beddeli doona.

#### Raadraacaha waxqabadka ayaa muujinaya:

- **Waxqabadyada hadda** – kuwani waa waxqabadyada iminka laga shaqaynayo.
- **Horumarka ilaa iminka** – waxay tani muujinaysaa horumarka laga gaaray mudnaanaha.


#### Waxqabadyada Hadda

Marka waxqabadyada (hababka hore loogu soconayo) ee suurogalka ah la jeexo ama la dejiyo, waxaa lagu dari doonaa waxqabadyada hadda oo waqtiyada lagu fulinayo ayaa lagu xiri doonaa mid kastoo ka mid ah waxqabadyada.


Cabbirrada natijada, sida ay guusha u eg tahay, iyo jadwallada, ayaa lagu dejin doonaa Guddiga Iskaashiga Daryeeleyaasha ee Xaafadda.



Lambarka mudnaanta	Meesha(meelaha) wax laga qabanayo	Tallaabooyinka lagu fulinayo waxa muhiim u ah daryeelyaasha	Cabbirka natiijada	Sida ay guushu u eg tahay	Jadwalka/taariikhda kama dambaysta
1	<b>Wadaxirirka</b>	Maqaal dheer oo ku saabsan daryeelyaasha geli daabacaadda maxalliga: Camden New Journal, Camden Magazine			
2	<b>Wadaxirirka</b>	Daryeelyaasha kala shaqee horumarinta hadallada la isticmaalo si loo qeexo ama loo sharxo daryeelyaasha iyo kaalinta daryeelka.			
3	<b>Wadaxirirka</b>	Sameey liiska meelaha iyo munaasabadaha maxalliga ee lagu xayaysin karo adeegyada daryeelyaasha iyo macliumaadka ku saabsan adeegyada, sida farmashiiyada, boodhadhka ogaysiinta bulshada.			
4	<b>Wadaxirirka</b>	Sameey buugyareyaal iyo sawirro derbi oo ku qoran luqado bulisho kaladuwani – qaybi eeg 3 sare. Nuskhadda internetka ayya welliba loo baahan yahay.			



<b>5</b>	<b>Wadaxiriirkha</b>	Adeegyada oo eega sida ay u isticmaalaan baraha bulshada si ay u ogaadaan daryeeleyaal dheeraad ah, gaar ahaan sida loola xirriyo daryeeleyaal qaangaar da' yar oo dheeraad ah.		
<b>6</b>	<b>Wadaxiriirkha</b>	La xirir ururradha taageera dadka naafaysan si loogala hadlo daryeeleyaasha.		
<b>7</b>	<b>Macluumaadka &amp; Talada</b>	Daryeeleyaashu in ay caawiyaaan tababbarka la siyo adeegyada, in ay wadaagaan waayaha oo ay wacyigeliyaan.		
<b>8</b>	<b>Macluumaadka &amp; Talada</b>	Soo saar maabka ama khariidadda adeegyada si daryeeleyaashu ay u ogaadaan cidda ay la xirirayaan.		
<b>9</b>	<b>Macluumaadka &amp; Talada</b>	Xayaysiinta barnaamijiyada kaarka sicir dhimista ee hadda diyaar u ah daryeeleyaasha.		
<b>10</b>	<b>Macluumaadka &amp; Talada</b>	Dhammaan baraha intarnetka ee Iskaashiga Xaafadda ka eeg macluumaadka ku saabsan daryeeleyaasha oo cusbonaysii. Doodo kooxeed arrintan ku saabsan ayaas suurogal ah.		
<b>11</b>	<b>Macluumaadka &amp; Talada</b>	Qabanqaabi meelo ay daryeeleyaashu ballan la'aan ku yimaaddaan halkaasoo ay daryeeleyaashu ka ogaan karaan xuquuqda iyo adeegyada, ku deeq hadallo ama khudbado. Sida maktabadaaha, xarumaha bulshada, kooxaha diimeed.		



			Jadwalka/ taariikhda kama dambaysta
Lambarka mudnaanta	Meesha(meelaha) wax laga qabanayo	Tallaaboooyinka lagu fulinayo waxa muhiim u ah daryeeleyaasha	Cabbirka natiijada
12	Macluumaadka & Talada	<p>Soo saar filkrado si cusub loogu fikiro oo lagu gaaro daryeeleyaasha. Tusaale ahaan:</p> <p>Marka daryeeleyaashu ay helayaan waxyaabaha ay ka mid yihiiin tallaallada ifilada ama hargabka, miyay tani noqon kartaa waqtii lagu bixiyoo macluumaaad dheeraad ah oo ku saabsan daryeelaha?</p> <p>Isticmaalka hinsisaad cusub leh ee farmashiiyada – macluumaadka daryeeleyaasha oo lagu qoro waraaqaha dhejiska ah marka la soo qaadanayo daawada ama lagu qoro buugyare la geliyo bacda.</p>	<p>Sida ay guushu u eg tahay</p> <p>Sarkaalka Hoggaaminaya Iskaashiga Xaafadda (oo ay ka mid tahay waaxda/ ururka, ama adeegyada kale ee ku lug leh.)</p>
13	Macluumaadka & Talada		
14	Caafimaadka Maskaxda		
15	Caafimaadka Maskaxda		

<b>16</b>	<b>Wadahadallada Daryeelaha</b>	Qiimeey haddii ay suurogal tahay in la sameeyo ogaysiin otomaatig ah marka la gaaro waqtiga dib u eegista wadahadalka daryeelaha.
<b>17</b>	<b>Qorshaynta wixii kale ee dhici kara</b>	Dejinta habsocod lagu xaqiijyo in qorshooyinka beddelka ah ee lagaga hortago wixii kalee dhici kara la hirgellyo haddii ay xaalad degdeg ahi timaaddo; iyo qiimaynta suurogalka barnaamijka 'Kaarka Degdeggaa' (Emergency Card).
<b>18</b>	<b>Qorshaynta wixii kale ee dhici kara</b>	La xiriir Qorshaha Daryeelka Guud ee NHS London (NHS London Universal Care Plan), oo ku xiran qorshaynta degdeggaa.
<b>19</b>	<b>Taageerada Daryeelaha Qaangaarka Da' yar</b>	La xiriir adeegyada taageera daryeeleyaasha da'da yar, si loo wanaajijo shaqada wadajirka ah ee lagu taageero u guuritaanka qaangaarnimada ee daryeeleyaasha. Sii waditaanka hirgelinta Ma jiro Albaab Qalad ah (No Wrong Door).
<b>20</b>	<b>Taageerada maaliyadeed</b>	Qiimeey suuropalka Kaarasha sicir dhimista si loogu isticmaalo ganacsiyada maxalliga.

Marka la eego mudnaanaha ku jira qaybta II, waxay daryeeleyaasha tilmaameen in Wadaxiirka, Macluumaadka & Talada iyo Caafimaadka Maskaxdu ay yihiiin meelaha loo baahan yahay in hora la eego. Waxaa arrinta lagu muuijiyay raadraacaha. Waxqabadyada qaarkood, oo ka mid ah meelaha kale ee mudhaanta leh, ayaa sidoo kale liiska lagu qoray maxaa yeeley daryeeleyaasha ayaa u arkayey in ay kuwani muhiim yihiiin.



## Horumarka Ilaa Iminka

Horumarka Ilaa Iminka	Horumarka ilaa iminka
<b>Meesha wax laga qabanayo</b>	<ul style="list-style-type: none"><li>La sugay heellanaanta daneeyeyaaal badan si loo fuliyo Guddiga Iskaashiga Daryeeleyaasha ee Xaafadda kama dambays dhammaadka 2024.</li><li>Daryeeleyaasha ayaa laga qaybgeliyey isbeddellada sanadka 2024 lagu sameeyey adeegga xiriirinta telefoonka ee Kawnsalka, Contact Camden (La xirfir Camden)</li></ul>
<b>Wadaxirirkha</b>	<ul style="list-style-type: none"><li>Dhisidda barta intarnetka Qorshaha Waxqabadda Daryeeleyaasha:<a "="" camdencarechoices.camden.gov.uk="" href="https://carersactionplan.camden.gov.uk, oo la furi doono xagaaga 2024, ayaa ku xiran Camden Care Choices (Xulashooinka Daryeelka Camden), bar intarnet oo laga helo macluumaadka daryeeleyaasha: &lt;a href=" https:="" support-and-advice-for-carers="">https://camdencarechoices.camden.gov.uk/support-and-advice-for-carers/</a>. Macluumaadka ku jira xulashooinka Daryeelka Camden ayaa dhawaan la beddelay Gugii 2024 waxaan la hubiyey in ay waafaqsan yihiin Sharciga Daryeelka. Dodo kooxeed kalanduwani ayaa la qabtay quidhii 2023 iyo 2024 si loo gaato daryeelyaal dhieeraad ah oo looga hadlo taageerada ay xaq u leeyihin.</li><li>Xagaaga 2024, ururro takhassus leh ayaa heli doona maalgelin si loo soo ogaaado oo loo hawlgeeliyo daryeelyaasha ah rag iyo LGBTQ+.</li></ul>
<b>Macluumaadka iyo talada</b>	<ul style="list-style-type: none"><li>Iskaashiga Caafimaadka Maskaxda ee Waqooyiga London (North London Mental Health Partnership) ee si cusub loo asasaasay ayaa soo saaraya xeeladda daryeeleyaasha, taasoo la xiriri doonta fulinta qorshaha waxqababka.</li><li>Bishii Maarsro 2024, waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka ayaa hawl hubin ku sameeyey wadahadalladooda daryeeleeha.</li><li>Bishii Juun 2024, waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka ayaa shaqaysiifyey hoggaamiyaha horumarinta xirfadda daryeeleeha oo diiradda saaraya wanaajinta xirfadda ama shaqada daryeeleeha ee Camden. Kaalintan ama jagadani waxay sidoo kale gacan ka gaysan doontaa in la hirgeltyo taloooyinka ka soo baxa hawl hubintta.</li><li>Waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka ayaa bilowday qorshooyin lagu cusboonaysiifyo hagista xirfaddeeda, taasoo ku toosan xirfadda ama shaqada ku salaysan awoodaha, Xeeladda Wux Muhiim ah (What Matters Approach) ee ay Camden ka muujiso Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka. Waxaa qorshaysan in daryeelyaasha laga qaybgeliyo marka arrintan la horumariyo. Waa in arrintan la dhammaystiro ugu dambayn dhammaadka 2024.</li><li>Horraantii sanadka 2024, Adeegga Naafada Waxbarashada (Learning Disability Service) ee Camden ayaa magacaabay shaqaalaha bulshada ee horumarinta daryeeleeha qoyska si loogu taageero hawlgeinta xirfadda.</li><li>Iyago la shaqaynaya maamulaha xilsaariista iyo hoggaamiyaha xirfadda ee loogu talagelay maangooniida, waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka ayaa xaqijinaya in qorshaha waxqababku uu ku xiran yahay xeeladda maangooniida ee la cusboonaysiifyey ee horumaraysa. Waxaa arrintan dariuri u ah in la xaqijiyo in daryeelyaasha wax u qabta dadka maangooniida ahi ay wadahadallada daryeeleeha u helaan si la mid ah dadka kale.</li></ul>
<b>Caafimaadka Maskaxda</b>	<ul style="list-style-type: none"><li>Qorshooyin ayaa loo dejiyey in la wanaajivo xirfadda ama shaqada waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka si wadahadallada daryeeleeha iyo foornamka qimaynta loogu daro qorshaynta xaaladda degdeffa/mustaqbalka.</li><li>Adeegga Naafada Waxbarashada ee Camden ayaa eegaya halisaha iyo qorshooyinka lagu yaraynayo ee loogu talagaly daryeelyaasha qoyska ee waayeelka ah ama kuwa qoyska ee caafimaad daran.</li><li>Waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka ayaa bilowday shaqo ay ku fahmayso waxtarka filcan ee uu lahaa kaarkii daryeelyaasha ee hore, iyo casharrada laga qaataay sababta tan loo sii wadi waayey.</li></ul>
<b>Wadahadallada daryeeleaha</b>	<ul style="list-style-type: none"><li>Qorshaynta xaaladda degdeffa/mustaqbalka</li></ul>

Meesha wax lagaa qabanayo	Horumarka ilaa iminka
<b>Caafimaadka iyo ka sidaynta isbitaalka</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Sanadkii 2023, Camden Carers (Daryeeleyaasha Camden) ayaa heshay maalgelin dheeraad ah oo loogu talagalay Mashruuca Horumarinta Isbitaalka iyo Dhakhtarka Guud (GP) si daryeeleyaasha loogu taageero isbitaallada, iyo ka dib marka laga soo daayo, iyadoo lagu darayo xirfadda ama shaqada flican ee lagu taageero xuquuqda daryeeleyaasha marka la eego dhammaan adeegyada caafimaadka ee Camden. Mashruuucan ayaa ku sii socda sanadka 2024.</li> <li>Adeegga Naafada Waxbarashada ee Camden iyo Camden Carers ayaa bilaabay in ay habeeyaan baasaboorka isbitaalka si loo wanaajiyoo waxyaabaha ay dadku la kulmaan waqtiga ay isbitaalka joogaan iyo si loo taageero natijoojinka caafimaadka.</li> <li>Xagaaga 2024, Camden Carers (Daryeeleyaasha Camden) ayaa heli doonta maalgelin dheeraad ah si loo kordhiyo baaxadda barnaamikooda baaritaannada caafimaadka iyo habnololeedka.</li> </ul>
<b>Taageerada YAC</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Xagaaga 2024, Camden Carers (Daryeeleyaasha Camden) ayaa heli doonta maalgelin loogu talagalay xeeladdoodaa YAC ee daryeeleyaasha qaangaarka da' yar, si loo taageero daryeeleyaasha u kala guuraya adeegyada carruuta ilaa adeegyada qaangaarka.</li> <li>Gugii 2024, waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka ayaa isku xirtay xeeladda daryeeleyaasha da'da yar waxayna xaqiijin doontaa in la sii wado xiriirada ay la leedahay qorshaha waxqababka.</li> <li>Waxaa la dejiyey qorshooyin loogu talagalay in waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarku ay hirgeliso Ma jiro Albaab Qalad ah (No Wrong Door); taasoo loogu talagalay in lagu wanaajiyoo adeegyada u kala dhexeyya adeegyada daryeelka bulsheed ee qaangaarka iyo carruuta, Guddiyada Daryeelka ee Isku darsan iyo ururada kalee muhiimka ah marka la ego aqoonsiga iyo taageerada la siijo daryeeleyaasha da' yar iyo qoysaskooda.</li> </ul>
<b>Taageerada maaliyadeed iyo shariyeed</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Bishii Jannaya 2024, waxaa la beddelay qaybita lacagta iyo gunnooyinka ee Xulashooyinka Daryeeleyaasha Camden. Waxaa arrinta ka mid ah qayb ku saabsan daryeeleyaasha.</li> </ul>



# **Qaybta 2 - Carers in Camden (Daryeeleyaasha jooga Camden)**

## **Ciddee ayaa ah daryeele (carer)?**

Tirakoobkii ugu dambeeyey 14,605 qof oo Camden jooga ayaa isku tilmaamay ama isku aqoonsaday daryeelayaal. Wuxaan og nahay in tirada daryeeleyaasha ee laga og yahay dhanka waaxda caafimaadka iyo daryeelka bulsheed ay tan ka yar tahay. Waxay tani ka dhigan tahay in ay Camden joogaan dad laga yaabo in ay seegaan gargaarka iyo taageerada laga bixiyo kaalintooda daryeelka. Wuxaan u baahan nahay in aan wada shaqayno si aan daryeelayaal dheeraad ah u gaarno oo aan ula xiriirno.

Miyaad tahay daryeele aanan mushaarlahayn? Miyaad waqtigaaga si bilaash ah u bixisaa, oo aad qaaddaa masuuliyado dheeraad ah, si aad u taageerto qof aad taqaan?

Qeexitaannada caadiga ah ee daryeeleyaasha aanan mushaarka lahayn waxaa lagu sheegaa taageerada loogu talagalay dadka naafaysan, qaba cudur ama xaalad caafimaad oo waqtidheer, oo ay ka mid yihiin caafimaadka maskaxda, naafada waxbarashada iyo/ama isticmaalka xun ee maandooriyaha, duwanaanshaha neerfaha (neurodiversity), ama taageerada loogu talagalay dadka u baahan gargaar dheeraad ah marka ay da'a weyn gaaraan.

Qofka aad taageerto ayaa noqon kara xubin qoys, saaxiib, ama deris, aad xiriir la dhisatay, oo rafaadi doona haddii aad caawin weydo. Mararka qaar tartiib tartiib ayaad u qaaddaa kaalinta daryeele marka ay waqtidib taageero dheeraad ah u baahdaan. Waxaa dhici karta in aad taageerto in ka badan hal qof. Ama waxaa dhici karta in aad taageero bixiso laakiiin aad weliba adiga laftigaagu hesho daryeel iyo taageero.

Daryeele ahaan waxaa laga yaabaa in aad daryeel ka bixiso hawla camaliga ah sida daryeelka nafta sida qof aad ka caawiso qubaysiga iyo dhar xirashada; ka caawinta cunto karinta iyo nadiifinta; maamulka daawooyinka; la hadlidda adeegyada; u doodista dadka; helidda macluumaadka iyo weydiinta talada; dad aad u qaaddo ballamaha iyo si ay ugu baxaan oo ay u soo joogaan bulshada dhexdeeda; ka caawinta maareynta lacagta iyo biilasha ama bixinta taageero shucuureed.

Qeexitaannadan ama sharraxaadyadani waxay waafaqsan yihiin masuuliyadaha sharchiyeed (eeg qaybta waajibaadka sharchiyeed ee lagu taageero daryeeleyaasha). Hase yeeshi, daryeeleyaasha aanan mushaarka lahayni waxay sheegeen in kaalinta daryeelku ay ballaaran tahay oo ay hawlulu kaladuwaniyihiin. Ma jiro labo maalmood oo marna isku eg, waxayna masuuliyaduhu u kala duwan yihiin qofka qofka kale. Daryeeluhu wuxuu gargaar ka bixin karaa daryeel u kala dhexeeyaa xoogaa saacadood toddobaadkii ilaa 24 saacadood. Waxaa laga yaabaa in aad aqalka la deggan tahay qofka aad daryeesho; ama waxaa laga yaabaa in aad meel kale ku nooshahay. Kaalinta daryeelka aaya sidoo kale is beddeli karta waqtidib. Daryeele ahaan wax kaste iyo wax walba ayaad u noqon kartaa qofka aad taageerto. Laakiin ujeeddadu ma aha uun waxyaabaha aad samayo, waxaa sidoo kale muhiim ah xirfadaha aad maalin walba isticmaasho. Waxyaabaha ay ka mid yihiin dhibaato xallinta, wada xaajoodka, qorshaynta, qareenimada ama u doodista, hal abuurka ama fikirkcusub, iyo dabacsanaanta.

Haddii aad u malayso in aad daryeele tahay, waxaan kugu dhiirrigelinaynaa in aad nala soo xiriirto. Macluumaadka xiriirka cidda aad la xiriiri karto aaya ku yaalla laga bilaabo **bogga 35**.

## Carers in Camden (Daryeeleyaasha jooga Camden)

**Sida ay daryeeleyaashu noo sheegeen, daryeelku wuxuu u baahan yahay "daal aad u badan, dhiirranaan iyo geesinimo", waxaan laga yaabaa in aad wax badan hurto, oo aad naftaada daryeeli weydo.**

Daryeeleyaashu waxay sheegeen in xogtu ay tahay waxa aasaas u yeelaya qorshahan. Xogta waxaa loo soo guray si loo fahmo xaaladda loogu talagalay qorshaha waxqabadka; si loo eego taageerada hadda, loo shaaciyo meelaha wax ka maqan yahay, xiriirro loo sameeyo oo loo ogaado meelaha u baahan in la sii baaro. Waxaa laga helay fikirka sabab u ah in aan u baahan nahay in aan hore ugu socodsiinno qorshahan waxqabadka.

### Tirakoobkii sanadkii 2021

**14,605**



**qof oo jooga Camden** ayaa isku tilmaamay daryeelle, taasoo u dhiganta **boqolkiiiba 7(%)** shacabka.

**5,201**

**qof** ayaa bixiya in ka badan

**35**  
**saacadood**  
oo daryeel ah toddobaadkii.


**53**

Boqolkiiiba

**(%)**

**ee**

**daryeeleyaasha** ayaa **is barbar wada** shaqada iyo masuuliyadaha daryeelka.



**Daryeeleyaasha qaarkood** ayaa sidoo kale ku jira kaalimo daryeel oo qofba qofka kale uu ku tiirsan yahay.




**Qiyaasta daryeeleyaasha**


jooga Camden ee soo sheegay caafimaad liita ayaa ka badan dadka aanan daryeelle ahayn, waqtigaasoo ay welii taageeraan qofka ay daryelaan.



- Dadka aanan Daryeelle ahayn Bilaa Caafimaad Fiican
- Dadka aanan Daryeelle ahayn Caafimaad Fiican



- Daryeeleyaasha Bilaa Caafimaad Fiican
- Daryeeleyaasha Caafimaad Fiican



Waxay xogtani tilmaamaysaa in dadka isku sheega daryeеле, ay ku jirto qiyas badan oo ka shaqeeya wax u dhigma shaqo waqtii buuxa marka ay taageeraan qofka ay daryeelaan, iyadoo masuuliyadaha daryeelku ay saamayn ama raad toos ah ku yeeshaan maamulka shaqada gaar u ah daryelaha. Waaan og nahay in daryeeliddu ay noqon karto masuuliyad culays saarta shucuurta, jirka iyo maaliyadda ama dhaqaalaha; daryeeliddu waxay keeni kartaa daal xad dhaaf ah, oo daryeeleyaasha laftigooda ayaa mararka qaar u baahan daryeeleyaal, ama isku hallayn kara qofka ay daryeelaan si ay iyagana u daryeelaan.

Camden gudaheeda, waaan ku aqoonsan nahay in kaalinta daryeelka aanan loo eegi karin si gooni ah oo ay si adag ugu xiran tahay arrimo kale sida aqoonsiga qofka iyo baahiyaha caafimaadka iyo daryeelka bulsheed ee iyaga gaar u ah. Waaan nahay xaafad ay helitaanka guri nabad ah oo sugaran, tirada badan ee dadka kelida ah iyo sinnaan la'aantu ay saameeyaan natijjooyinka wanaaggabka dadka degan xaafada, waxaana jirta in daryeeleyaal rubuc ka badan ay soo sheegaan in aanay caafimaad fiican ku sugnayn.

## 1,662

**Daryeeleyaal Madow, Aasiyan, iyo jinsiyad kaloo laga tiro badan yahay** ayaa isku tilmaamay in ay caafimaad daran yihiin. Waxaa kuwan ka mid ah **570** bixiya in ka badan **50** saacadood oo ah daryeel aanan mushaar lahayn toddobaadkii.



## 1,204

**qof oo u dhexeeya 16 jir ilaa 24 jir** ayaa isku qexay daryeeleyaal.



## 2,240

**qof oo ah 65+** ayaa bixiya daryeel aanan mushaar lahayn. **777** daryeeleyaal **65** jir ah ama ka weyn ayaa bixiya in ka badan **50** saacadood toddobaadkii oo ah daryeel aanan mushaar lahayn.


## 5,848

**daryeeleyaal ayaa isku tilmaamay lab.** Kuwan waxaa ka mid ah 1,266 oo bixiya 50+ saacadood oo ah daryeel aanan mushaar lahayn toddobaadkii.



## 8,592

**daryeeleyaal ayaa isku tilmaamay dheddig.** Kuwan waxaa ka mid ah 2,276 oo bixiya 50+ saacadood oo ah daryeel aanan mushaar lahayn toddobaadkii.



## Mobilise intii u dhixeyso Juun 2023 iyo Meey 2024

**1,165**

Gaaray 10,500  
daryeeleyaal, oo soo  
**gujiyey** barta intarnetka  
Mobilise oo ay u soo  
mareen ololeyaasha  
dijitalka.



Lala xiriiray  
455 ka mid ah  
daryeeleyaashan  
si ay iskaga  
diiwaangeliyaan  
Mobilise.

**160**

a mid ah 10,500 ka  
daryeele waxaa loogu  
baaqay taageero gooni  
ah, sida koorsooyinka  
elektarooningga, hageyaal  
shakhsiyasan iyo la  
macaamilidda kooxda  
taageerada daryeeleyaasha  
ee Mobilise.

### Camden Carers, sanadkii 2023-24:

**4,400**

oo daryeeleyaal ayaa ka  
diwaangashan Camden Carers.

**1,708**

ka mid ah 4400 ka daryeeleyaal  
ayaa ka soo jeeda bulshooyinka  
Madowga, Aasiyanka ah iyo  
jinsiyadaha laga tiro badan yahay.



3099 ka mid ah 4400 ka  
daryeele ayaa isku tilmaamay  
dheddig, 1189 lab, 5 lab-dhaaf,  
2 dheddig jinsi rogan, 4 doorbiday  
in aanay is qexin.



**381**

ka mid ah  
4400 ka daryeele  
ee diwaangashan waxaa  
si cusub loo diwaangeliyey  
sanadkaas.



Waxaa la qabtay 451  
wadahadal daryeele  
ama dib u eegis.

**175**

baaritaan  
caafimaad iyo  
habnololeed  
ayaa la qabtay



**122**

122 daryeeleyaal  
waxaa taageerayey  
adeegga Latalinta  
ama caqliselinta.

**1,734**

daryeeleyaal gooni ah ayaa helay  
waxqabad/taageero toos ah (waxaa  
tan ka mid ah wadahadallada  
daryelaha, latalinta, kooxaha kulma,  
waxqabadyada iwm.)

## Xogta Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka, ee sanadkii 2022-23:

**1,165**

qof ayaa laga  
og yahay  
dhanka waaxda

Daryeelka Bulsheed ee  
Qaangaarka in ay yihii  
daryeeleyaal aanan mushaar  
lahayn, 580 ayaa ku cusub  
adeegyada waaxda ASC ee  
Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka.  
Waxay daryeelaan **1142** qof.

**504**

daryeeleyaal ayaa  
daryeelayey dad adeeg  
ka hela waaxda ASC.



**571**

ayaa helay qiimaynta  
daryelaha: **280** ayay qabteen  
xirfadleyaasha daryelka  
bulshada oo **291** ayay qabatay  
Camden Carers (Daryeeleyaasha  
Camden)\*.



**Daryeeleyaasha  
laga og yahay  
dhanka waaxda  
ASC** ayaa ka  
filasho badan in  
ay taageeraan  
dad qaba naafo  
waxbarasho ama  
naafo jirka ah.

**62**

**qiimayn iyo dib u  
eegis daryeele** ayaa ku  
saabsanaa dad daryeela  
qof qaba naafooyin  
waxbarasho oo laga og  
yahay dhanka Adeegga  
Naafada Waxbarashada  
ee Camden.

Adeegyada daryelaha ee hadda ka jira Camden waxaa lagu bixiyaa taageero kaladuwan oo ka kooban  
adeegga loo joogo ama fool-ka-fool ah iyo sidoo kale midka intarnetka. Waxay tani Camden u  
suurtogelinaysaa in ay adeegga fidiso oo ay gaarsiiso noocyoo kaladuwan ee daryeeleyaal, maxaa yeelay  
waxaan og nahay in daryeeleyaashu ay isku dheellitiraan ama isku wadaan dhownr mudnaano oo ay  
leeyihii baahiyo isku kala gudba ee iyaga gaar u ah. Sida xogta ka muuqata, daryeeleyaashu waxay  
ka soo jeedaan asallo iyo jinsiyado noocyoo kaladuwan ah, markaa ma jiri karto xeelad dadkoo dhan la  
iskugu simo oo lagu bixiyo taageerada.

Daryeeleyaashu waxay kaalintooda daryelka ku dheellitiraan oo ay ag wadaan ahaanshaha waalid,  
saaxiib, xubin qoys, ama lammaane – oo kaalintoodu waxay soo dhixgeli kartaa sifoooyinkooda  
dhawran ee shakhsiyeed. Iyadoo taas ku habboon, waa in aan tixgelinno suurogalka takoorka iyo iska  
neceybka laga yaabo in uu qofku la kulmo marka uu dhix maaxayo nidaamka, waana in aan xaqijino in  
aan dadka kula kulanno halka ay joogaan, annagoo la shaqaynayna shuraakada bulshada ee takhasus  
leh ee fahansan daryeeleyaasha ee iyaga la xiriiri kara.

Waxaa jira daryeeleyaal taageero ka hela waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka, iyadoo ay  
shaqaalaha bulshada ku lug leeyihii daryelkooda ama daryelka qofka ay daryeelaan. Marka  
adeegyo dheeraad ahi ay ku lug yeeshaan, xaaladda ayaa sii adkaan karta, markaa waxaa muhiim ah  
in la shaaciyo baahida khaaska ah ee qaybtan hoose ee daryeeleyaasha iyadoo xirfadleyaasha lagala  
shaqeeyo qorshaynta daryelka iyo taageerada.

Xogta ayaa muujisay in adeegyadu aanay gaarin tirada daryeeleyaasha ee jooga xaafadda si ay ugu  
deeqaan taageero ay ku sii wadaan kaalintooda daryelka oo ay ku taageeraan wanaaggabka. Waa  
loogu deeqo daryeeleyaasha jooga Camden ayaa lagu muuijey lagaa bilaabo **bogga 35**.

Waxaan kolba mar dib ugu noqon doonaa xogta la xiriirta daryeeleyaasha. Annagoo raadinayna  
fursado cusub si loo kordhiyo macluumaadka la soo uruuriyo, loo wanaajiyo fahanka iyo caddaynta  
sida daryeeleyaasha looga taageero adeegyada oo dhan; oo loo cabbiro saamaynada qorshaha  
waxqabadku uu ku leeyahay daryeeleyaasha jooga Camden.

## **Waajibaadyada sharchiyeed ee lagu taageero daryeeleyaasha**

Qorshaha waxqabadka waxaa carrabka lagu saaray in xeelad nidaamka oo dhan ku toosan loo muujiyo daryeeleyaasha. Waxay tani ka dhigan tahay in lala shaqeeyo adeegyo iyo ururro kaladuwani oo laga yaabo in ay taageeraan daryeeleyaasha aanan mushaar lahayn. Waxaa jira waajibaadyo ama masuuliyado sharchiyeed oo lagu tiiriyo habka adeegyada qaunuuniga ah, sida Kawnsalka Camden iyo adeegga NHS, ay ula shaqeeyaan ama wax ugu qabtaan daryeeleyaasha aanan mushaar lahayn.

**Sharciga Daryeelka 2014** ayaa ah sharciga xusaya sida habboon in daryeelka bulsheed ee qaangaarka looga bixiyo England si loo wanaajiyo madaxbannaanida iyo wanaaggqabka dadka. Sharciga Daryeelka ayaa lagu aqoonsaday in taageeridda daryeeleyaashu ay u muhiim tahay sida dadka ay daryeelaan. Sharciga Daryeelka ayaa daryeelaha ku qeexaya, "qof qaangaar ah oo daryeel siiya ama ku tala jira in ay daryeel siiyaan qof kaloo qaangaar ah".

Daryeeleyaasha oo dhan ayaa xaq u leh qiimaynta daryeelaha. Camden gudaheeda, waxaa kuwan lagu magacaabaa wadahadallada daryeelaha.<sup>1</sup>

Haddii daryeelle uu qabo baahiyo uu ugu qalmo oo lagu soo ogaaday qiimaynta, waxay xaq u leeyihii taageero. Daryeeleyaashu waa in ay helaan qorshe taageero, kaasoo ay ka mid noqon karto miisaaniyad shakhsii ahaaneed, oo lagu tixgelinayo waxyaabaha uu daryeeluhi rabo in uu fuliyo maalinba maalinta ku xigta si looga taageero kaalintooda daryeelka.

Daryeeleyaasha da'da yar ama daryeeleyaasha waalid ah waxay sidoo kale xaq u leeyihii qiimaynta guuritaanka marka la raaco Sharciga Daryeelka marka daryeelaha, ama qofka ay daryeelaan, ay ku dhawaadaan da'da 18 jir oo la filan karo in ay taageero u baahdaan.

Kawnsalladu waa in ay weliba adeegyo macluumaad iyo talo siiyan daryeeleyaasha oo dhan si looga hortago, loo yareeyo ama loo raajiyo dhalashada baahiyaha daryeelka iyo taageerada ka waqtidheer, iyo si loo caawiyo taageerada wanaaggqabkooda gaarka ah. Camden gudaheeda waxaa tan laga heli karaa Xulashooyinka Daryeelka Camden (Camden Care Choices): <https://camdencarechoices.camden.gov.uk/support-and-advice-for-carers/>

Dawladaha hoose waa in ay weliba diyaariyaan qareen madaxbannaan oo la siiyo daryeelle kaste oo ay ku adkaanayso in ay ka qayb qaataan qiimayntooda ama qorshayntooda taageerada, marka uusan jirin qof kaloo caawin kara.

**Sharciga Caafimaadka iyo Daryeelka 2022 (Health and Care Act 2022)** ayaa bilaabay Guddiyada Daryeelka Isku darsan (Integrated Care Boards) (ICB) ee adeegga NHS ee cusub. Iyadoo loo marayo dhisidda guddiyada iskaashiga hay'ado badan ee maxalliga, guddiyada ICB ayaa isku wada in ay ururrada caafimaadka iyo daryeelka u fududeeyaan in ay daryeel isku xiran siiyan dadka taageero uga baahan adeegyo badan. Camden waxay qayb ka tahay guddiga ICB ee Waqooyiga Dhewe ee London (North Central London) (NCL). Shan xaafadood oo London ka tirsan ayaa ku jira guddiga ICB ee aagga NCL, afarta kalee xaafadood waa Barnet, Enfield, Haringey, iyo Islington.

Xaafad kaste waxay leedahay iskaashiga daryeelka isku dhafan ee gaar u ah oo ka kooban ururro wadajir u shaqeeya si ay u qorsheeyaa oo ay u fuliyaan adeegyada isku xiran ee caafimaadka iyo daryeelka, iyo si ay u wanaajiyaan nolosha dadka ku nool ama ka shaqeeya degaankooda. Waxay diiradda saaraan ka hortaga, natijjooyinka uga fiican dadka iyo yaraynta sinnaan la'aamaha caafimaadka. Camden gudaheeda, waxaa tan lagu magacaabaa Iskaashiga Xaafadda Camden (Camden Borough Partnership). Waxay ka kooban tahay ururrada adeegga NHS oo ay ka mid yihiin Caafimaadka Maskaxda, Kawnsalka, laanta Samafalka Beesha iyo Ganacsiga Bulsheed (Voluntary Community and Social Enterprise) (VCSE) iyo ururro kale sida bixiyeyasha daryeelka bulsheed ee la xilsaaro.

Sharcigu waxuu xusayaa waajibaadka ka jira in daryeeleyaasha aanan mushaar lahayn iyo dadka ay daryeelaan laga qayb geliyo go'aan gaarista. Waxaa la sugayaa in daryeeleyaasha laga qayb geliyo dhanka daryeelka qofka iyadoo ay ka mid yihiin ka hortagga, cudur sheegista iyo daawaynta iyo isbeddellada ama horumarinnada lagu sameeyo adeegyada. Daryeeleyaashu waxay sidoo kale leeyihii xuquuq khusaysa sii daynta isbitaalka.

<sup>1</sup>Xaqquqda qiimaynta ayaa ku salaysan oo keliya daryeeleyaasha oo yeeshaa 'muuqaalka baahida' loo qabo daryeelka iyo taageerada. Ma jiraan shruuudo u yaalla tirada saacadaha ama heerka daryeelka ee uu daryeeluhi u baahan yahay in uu bixiyo si qiimayn loogu sameeyo. Daryeeluhi uma baahna in uu ku nool yahay aagga Kawnsalka samaynaya qiimaynta daryeelaha, laakiin qofka daryeelka hela ayaa u baahan in uu ku nool yahay, ama ahaado 'deggane caadi ah', ee aagga Kawnsalka. Sharciga Daryeelku wuxuu waajib guud ka saaraya Kawnsallada in ay abaabulaan ama wanaajiyaan wanaaggqabka shakhsiga. Waxaa jira mabaadii' khusaysa wanaaggqabka oo qayb ka ah shuruudaha u qalmista ee ku jira qiimaynta daryeelaha. Kawnsalladu waa in ay iskood ugu dhaqaqaan in ay tixgeliyaan saamaynta ay daryeeliddu ku leedahay wanaaggqabka.

Waxaa jira Shuruuc kale oo dhawra xuquuqaha daryeeleyaasha, waxaana ka mid ah Sharciga Xuquuqda Aadamaha 1998 (Human Rights Act 1998), Sharciga Sinnaanta 2010 (Equality Act 2010), iyo Sharciga Shaqada iyo Qoysaska 2006 (Work and Families Act 2006).

Waxaa sidoo kale jira waajibaad uu dhigay Sharciga Carruurta iyo Qoysaska 2014 (Children and Families Act 2014). Tusaale ahaan, xaqa u lahaanshaha qiimaynada daryeeleyaasha da'da yar iyo daryeelah waalidka ah. Waxay tani ka baxsan tahay xadka qorshahan waxqabadka, maadaama uu qorshaha waxqabadku diiradda saarayo dadka qaangaarka ah ee 18 jir ka weyn ee daryeela dad qaangaar ah, ama dad ku dhow qaangaarnimada. Waxaa laga shaqaynayaa xeeladda daryeeleyaasha da' yar oo lagu soo xiri doono qorshahan waxqabadka.

Hagista kale iyo siyaasadaha qaran ee ka hadlaya daryeeleyaasha aanan mushaarka lahayn waxaa ka mdi ah Qorshaha Waqt Dheer 2019 (Long Term Plan 2019) ee adeegga NHS; Machadka Qaran ee Heerka sare ee Caafimaadka iyo Daryeelka (National Institute for Health and Care Excellence) (NICE); iyo Guddiga gaarka ah ee Tayada Daryeelka (Care Quality Commission).

## Sida loo soo saaray qorshaha waxqabadka

Daryeeleyaal badan oo ku kala baahsan Camden ayaa waqtii qiyas badan ku bixiya daryeelka ay siiyan qof kale, ama in ka badan hal qof, waxaana duwan waayaha uu qof walba ka helo daryeelka.

Inkastoo ay jiraan waajibaadyo sharchiyeed oo daryeeleyaasha xuquuqo u siinaya taageerada qaunuuniga ah, haddana daryeeleyaashu waxay walaacyo iyo waayo isku mid ah ka sheegeen in daryeeleyaasha oo dhani aanay isku aqoonsanin daryeeleyaal aanan mushaar lahayn, iyo in aanay ogayn xuquuqdooda ama sida taageerada loo helo. Daryeeleyaashu waxay sidoo kale ka hadleen baahida loo qabo in la helo adeegyo si ka fiican iskugu xiran ee caafimaad, daryeel bulsheed iyo kuwa kalee dawladda hoose iyo samafalka iyo beesha.

Waxaa sidoo kale lagu fikiray in la sameeyo qorshe waxqabad, waxuu kani noqon doonaa mid dhaqdhqaqaq leh, is beddela waqtii ka dib oo aanan iskafaalo boor leh uun dul saarnayn iyadoo aanay cidina eegin. Waxaa daruuri u ah qorshaha waxqabadka wada soo saarista, iyadoo ay daryeeleyaashu hoggaamiyaan dejinta. Intii la horumarinayey qorshaha, daryeeleyaashu waxay awoodeen in ay tilmaamaan meelaha mudhaanta leh oo ay ka fikiraan waxqabadyada khuseeya sida kuwan lagu fulinayo.

Bartamaha soo saarista ama horumarinta qorshaha waxqabadka, waxaa ugu jira koox shaqo oo ay ka kooban yihii, oo la xiriirayey, daryeeleyaasha jooga Camden si loo fahmo waayahooda daryeelle ahaan. Kaalimaha ama jagooyinka ka furnaa kooxda shaqada ayaa loo xayaysiiyey daryeeleyaasha aanan mushaar lahayn. Xubnaha kooxda shaqada waxaa ka mid ah daryeeleyaal iyo dad hore daryeeleyaal u ahaa, oo ay barbar socdaan adeegyada taageera daryeeleyaasha oo ay ka mid yihii waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka, Iskaashiga Caafimaadka Maskaxda ee Waqooyiga London (North London Mental Health Partnership), Camden Carers (Daryeeleyaasha Camden) iyo Mobilise. Daryeeleyaasha ku jira kooxda shaqada ayaa hoggaamiyey soo saarista qorshaha, iyagoo wadaagay waayahooda iyo aqoontooda.

Kooxda shaqada ayaa ogaaday in ay hore u jiraan macluumaa badan oo diyaar ah oo ku saabsan waxa muhiim u ah daryeeleyaasha iyo halka laga yaabo in ay waxyaabo ka maqan yihii ee khusaysa dadka isku aqoonsada daryeeleyaal iyo helitaanka taageerada. Macluumaadkan waxaa lagu helay wadahadal toos loola yeeshay daryeeleyaasha jooga Camden; baaridda xogta ay hayaan adeegyada ka jira Camden ee ku saabsan daryeeleyaasha; iyo weliba eegidda cilmibaarista qaran.

Waxaa arrintan loo isticmaalay si loo sameeyo qabyada qorshaha waxqabadka. Qabyada ayaa markaa loo qaaday meelo, ururro iyo adeegyo badan si loo tijaabiyo oo loo kordhiyo fikradaha ku jira qorshaha.



Waxaanaka mid ah kooxo diiradsaar si loo horumariyo meelaha ku jira qorshaha iyo kulanno loogu talagalay in lagula hadlo kooxo khaas ah ee daryeeleyaal, tusaale ahaan daryeeleyaasha waalid keliya ah. Codka Daryeeleyaasha Camden (Camden Carers Voice), koox ay hoggaamiyaan daryeeleyaashu oo loogu talagalay daryeeleyaasha oo ay habaysay Camden Carers, ayaa sidoo kale cod daruuri ah ku caawiyey qaabaynta iyo horumarinta qorshaha.

Waxaan aqoonsannay in ururrada iyo adeegyada kale ay iyaguna si gaar ah u leeyihin meelo ay ka shaqeeyaan iyo qorshooyin ay ugu talagaleen daryeeleyaasha, markaana waxaan si kastoo suurogal ah iskugu daynay in aan qorshaha waxqabadka kuwan ku xirno.

Waxaan iminkaa hayno waa qorshe waxqabad oo lala soo saaray daryeeleyaasha. Hirgelinta qorshaha waxqabadka waa uun bilow.

## **Cidda gargaar ka bixisay soo saarista qorshaha waxqabadka**

Xeelad nidaamka oo dhan ku toosan ayaa la qaadanayaa si loo horumariyo qorshahan waxqabadka. Waa in daryeeleyaasha la tixgeliyo marka la fulinayo ee lala shaqaynayo caafimaadka, adeegyada kawnsalka iyo laanta bulshada samafalka. Waxay tani ka dhigan tahay in kooxda shaqadu ay Iskaashiga Xaafadda Camden oo dhan ka soo raadiyeen kooxo iyo adeegyo lala hadlo; fahma shaqada la qabtay ama hadda hore loogu wado daryeeleyaasha; hababka la iskugu geynayo shaqada; fikradaha lagu horumarinayo qorshaha iyo meelaha ka maqan ee laga yaabo in aan ka wada shaqayn karno. Hawlahan soo wada saarista waxaa weliba loo isticmaalay fursad kaloo lagu gaaro oo lagula hadlo daryeeleyaal dheeraad ah, oo lagu hubiyo in daryeeleyaashu ay og yihiin sida ay ula xiriirayaan taageerada hadba marka ay loo baahdo. Qaar badan oo kooxahan ka mid ah ayaa marar badan la booqday. Ururrada iyo kooxaha ku xiran ee ku lug yeeshay waxaa ka mid ahaa:

### **Camden Carers (Daryeeleyaasha Camden)**

- Codka Daryeeleyaasha Camden
- Xeeladda Daryeeleyaasha Da'da yar ee loogu talagalay Camden Carers
- Isutagga Daryeeleyaasha Madowga ah (Black Carers Collective)
- Ahmiyad Siinta Daryeeleyaasha (Making Carers Count) – mashruuc lagu soo ogaado oo lagu taageero daryeeleyaasha ka soo jeeda bulshooyinka jinsidayaha laga tiro badan yahay (inta ugu badan bulshada Soomaaliyed, Bengaaliga iyo Shiinaha)
- Munaasabadda Baaritaanka Caafimaadka iyo Habnololeedka ee Camden Carers

**Mobilise** – adeeg daryeeleyaal qaran, dijital ah oo u diyaar ah daryeeleyaasha jooga Camden.

### **Waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka iyo Kawnsalka**

- Wada Qorshaynta (Planning Together) – guddi iskaashi loogu talagalay dadka qaba naafooyinka waxbarashada iyo daryeeleyaasha qoyska si ay ula kulmaan dadka maamula adeegyada laga yaabo in ay isticmaalaan.
- Guddiga iyo Kooxda Taageeridda Dadka, Isku xiridda Bulshooyinka (Supporting People, Connecting Communities) – kooxaha jiheeya, fuliya, oo kormeera barnaamijka mashaariicda beddelka ee gacan ka geysta fulinta xeladda Taageeridda Dadka, Isku xiridda Bulshooyinka
- Xubingole Anna Wright, Warbixin Xubin Dawli
- Kulanno lala yeeshay Xubingole Lorraine Revah, Hormuudka Daryeeleyaasha (Carers Champion)
- Kulannada adeegga Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka
- Guddiga Iskaashiga Caafimaadka Maskaxda (ka wada dhexeeya caafimaadka iyo daryeelka bulshada – daryeeleyaasha ayaa lagaga hadlay qiimaynta baahiyaha caafimaadka maskaxda iyo qiimaynta baahiyaha mukhaadaraadka iyo khamriga).
- Ku xiridda dib u cusboonaysiinta xeladda Maangoonida (Autism).
- Daryeelka iyo Taageerada lagu bixiyo Guriga (Care and Support at Home) oo baaraya habka loo fuliyo daryeelka iyo taageerada lagu bixiyo guriga.
- Xogta Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka
- Kooxda xeladda daryeeleyaasha da'da yar

## Caafimaadka

- Guddiga Iskaashiga Daryeelka Maxalliga – kooxda Iskaashiga Xaafadda Camden oo hoggaanka u haya isku darista caafimaadka iyo daryeelka.. Waxay dhisayaan barnaamij shaqo oo lagu magacaabo 'Start Well, Live Well, Age Well' (Bilow Wanaagsan, Nolol Wanaagsan, Gabow Wanaagsan), oo xusaya mudnaanaha ka turjumaya taageerada ay dadku u baahan yihii marxaladaha kaladuwaa ee noloshooda. Taageerada daryeeleyaasha laga siyo qorshaha waxqabadka iyo guddiga iskaashiga, ayaa qayb ka noqon doonta barnaamijkan.
- Guddiga Iskaashiga Daryeeleyaasha Caafimaadka Maskaxda – koox daryeeleyaal ka socda Iskaashiga Caafimaadka Maskaxda ee Waqooyiga London oo ka kooban adeegyo iyo daryeeleyaal ka socda Camden iyo Islington. Waxay ka shaqaynayaan xeeladda daryeeleyaasha ee ku toosan Caafimaadka Maskaxda. Waxay sidoo kale hoggaanka u hayaan shaqada lagu hirgelinayo Saddex xagalka Daryeelka (Triangle of Care). Sanadka 2024, Waxaa Guddigan beddeli doona Isbaahaysiga Iisticmaaleyaasha Iskaashiga Caafimaadka Maskaxda ee Waqooyiga London (North London Mental Health Partnership User Alliance) oo ka koobnaan doona daryeeleyaasha iyo xirfafdleyaasha caafimaadka maskaxda ee ka socda xaafadaha ka tirsan Waqooyiga Dhexe ee London .
- Golaha Daryeeleyaasha (Carers Council) – koox loogu talagalay daryeeleyaasha oo qayb ka ah ururka isbitaal ee Central and North West London NHS Foundation Trust (CNWL). Waxay sidoo kale hoggaanka u hayaan shaqada lagu hirgelinayo Saddex xagalka Daryeelka waxayna leeyihiin xeer qoraalka daryeeleyaasha.
- Kooxda Hawlgelinta Bukaanka iyo Dadweynaha (Patient and Public Engagement Group) ee Camden.

## Kuwa kale

- Age UK Camden – Kulanka Big Team (Kooxda Weyn) oo ah munaasabad shabakad dhisid oo loogu talagalay laanta VCSE iyo caafimaadka iyo adeegyada kawnsalka.
- Waxaa qorshaysan munaasabado lala qabto Xarunta Bulshada Soomaaliyeed ee Ingiriiska (British Somali Community Centre) iyo Ururka Shaqaalaha Bengaaliga ah (Bengali Workers Association).

Hawlahan ayaa sii socon doona, si sare loogu qaado muuqaalka qorshaha waxqabadka oo loo gaaro daryeeleyaal dheeraad ah.



## **Maxaa xiga – Guddiga Iskaashiga Daryeeleyaasha Xaafadda**

### **"Anigu waxaan ku rajo qabaa shaqadan laakiin waanan ka shakiyayaa, miyaa la fulin doonaa?"**

Si loo hubiyo in masuuliyadda qorshaha waxqabadka ay wadaagaan dhammaan ururrada ku jira Iskaashiga Xaafadda Camden, Guddiga Iskaashiga Daryeelaaha ayaa la aasaasi doonaa kama dambays dhammaadka sanadka 2024. Waxaa aarintan lagu magacaabi doonaa **Guddiga Iskaashiga Daryeeleyaasha Camden**. Guddiga ayaa ka masuul noqon doona xajinta qorshaha waxqabadka iyo xafidista wada xisaabtankiisa iyo horusocodkiisa. Guddiga iskaashiga ayaa la socon doona horumarka laga gaaro meelaha wax laga qabanayo oo xaqijin doona in mabaadii'da loo tixgeliyo shaqada oo dhan. Guddiga waxaa ka mid noqon doona daryeeleyaal, Xubingoleyaal, iyo wakiillo sare oo ka socda Iskaashiga Xaafadda oo dhan. Guddiga waxaa lagu xiri doonaa kooxaha kale ee go'aan gaara, sida Guddiga Caafimaadka iyo Wanaagqabka (Health and Wellbeing Board) iyo Golaha Baarista xeeldheer ee Caafimaadka iyo Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka (Health and Adult Social Care Scrutiny Committee), si loo xaqijiyo in waxqabadyada looga oggolaan karo oo loogu mudnaan siin karo darajada ugu sarraya.

Iyadoo qayb ka ah u heellanaanta daryeeleyaasha, waxaa sidoo kale jiri doona saddex kaalin ama jago: Hoggaamiyaha Mashruuca Daryeeleyaasha, Sarkaalka Mashruuca Daryeeleyaasha iyo Sarkaalka Taageerada Daryeeleyaasha oo taageeri doona shaqada qorshaha waxqabadka oo dhix geli doona guddiga iskaashiga. Kaalimahan waxaa la filan karaa in la bilaabo xilliga Dayrt 2024 waxaana maalgelin loo oggolaaday labo sano. Miisaaniyad ayaa sidoo kale la soo helay, taasoo loo isticmaali doono si loo taageero maamulka ama hawgalka guddiga, tusaale ahaan dhanka wadaxiriirka, laakiin waxaa sidoo kale isticmaali doona guddiga si ay u fuliyaan waxqabadyada ku dhix jira qorshaha.

Kooxda shaqada ayaa masuul ka sii ahaan doona fulinta maalinlaha ah waxyabaha mudnaanta u leh qorshaha waxqabadka, iyagoo la soconaya horumarka durdurrada shaqada (kooxaha hoose ee lagu abuuray waxqabadyo khaas ah) iyo xajinta kormeerka qorshooyinka. Kooxda shaqada (working group) ayaa warbixin u diri doona guddiga.

. Bilowga Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha ayaa ka yimid isbeddel dhawaan lagu sameeyey fulinta hawlgalka Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka oo loo yeelay xeelad xaafadda ku toosan, iyo dhisidda Kooxda Xaafadda ee Isku darsan (Integrated Neighbourhood Team) ee tijaabada ah oo laga bilaabay Bariga Camden. Hindisooyinkan beddelaaddu waxay ka turjumayaan tallaabada ay Camden ugu dhaqaaqayso in ay daryeelka bulshada ku bixiso heer maxalli, oo meel ku salaysan, oo diiradda lagu saaro hab lagula shaqeeyo oo meel lagula joogo dadka isticmaala taageerada, adeegyada bulshada iyo adeegbixiyeyaasha caafimaadka. Dhiska ama qaabka iyo fulinta Guddiga Iskaashiga Daryeeleyaasha Xaafadda ayaa wax lagaga baran doonaa oo sidoo kale lagu suurtogelin doonaa horumarinta xeeladdan meel ku salaysan iyadoo loo maro wadashaqaynta daneeyeyaa badan iyo shaqada iskaashiga ah ee iyada gaar u ah, waxaana loogu hawl diri doonaa in ay xaqijiyaan in codadka daryeeleyaasha iyo masuuliyadaha daryeelaaha dhammaanteed laga muujiyo oo lagu dhix daro.

### **Sidee ayaan u ogaan doonaa in uu isbeddel yimid?**

Waxaa daruuri ah in daryeeleyaasha weli laga qayb geliyo heer walboo shaqada ka mid ah si qorshaha waxqabadka loogu matalo waayahooda iyo mudnaanahooda. Waxay tani sidoo kale kordhin doontaa ka xisaabtanka qorshaha waxqabadka si loogu gaaro natijjooyinka muhiim u ah daryeeleyaasha, si aan markaa u ogaanno sida waxa fiican uu u eeg yahay iyo horumarka aan gaarnay.

Waxaa tiro badan qaababka waxqabadka natijjada ee ka jira dhammaan ururrada Iskaashiga Xaafadda. Waxaa sidoo kale jira cabbirro kaloo qaran sida qaabka waxqabadka natijjada Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka ama qaabka waxqabadka Ka Dhabaynta (Making it Real) ee ururka Think Local Act Personal (Maxalliga Ka fikir Shakhxiyadda Ku dhaqan). Waxaa wadajir la isku raacay in xeelad isku jirta ay tahay fursadda ugu fiican, halkii laga abuuri lahaa qaab waxqabad natijo oo u astaysan daryeeleyaasha jooga Camden. Marka habkan la adeegsdo saamaynta tallaabooyinka ayaa gaari karta halka ugu ballaaran.

Markii qorshaha waxqabadka la bilaabay, kooxda shaqadu waxay sameeyeen layli isbarbardhig ah oo loo isticmaalay qiimaynta salka machadka NICE ee loogu talagalay taageerada la siiyo daryeeleyaasha qaangaarka ah (NG150). Waxaa lagu tala jiraa in taasi dib loogu noqdo oo la isticmaalo si loogu cabbiro horumarka.

Machadka NICE wuxuu sidoo kale dejiyey xeerar tayo (QS200) oo ku jieeda taageerada la siiyo dadka qaangaarka ah ee 18 jir ah ama ka weyn ee daryeel siiya hal qof ama in ka badan oo 16 jir ah ama ka weyn oo qaba baahiyaha caafimaadka iyo daryeelka bulshada. Waxay xusayaan meelaha mudnaanta u leh wanaajinta tayada ee caafimaadka, caafimaadka dadweynaha iyo daryeelka bulshada waxaana loo isticmaali karaa hab lagu cabbiro horumarka.

Xeerasha tayada waxaa taageersan ururrada caafimaadka iyo sidoo kale daryeelka bulshada oo ay ka mid yihiin Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulsheed (Department of Health and Social Care); Ururka Ingiriiska ee Shaqaalaha Arrimaha Bulshada (British Association for Social Workers); Ururka Daryeeleyaasha (Carers Trust); hay'adda Caafimaadka Dadweynaha ee England (Public Health England), Kulliyadda Boqortooyada ee Dhakhaatiirta (Royal College of Physicians) iyo ururka Think Local Act Personal. Maadaama ay xeerashu la jaan qaadayaan mabaadii'da iyo mudnaanaha ku jira qorshaha waxqabadka waxaa loo maleeyaa in ay waxtar fiican yeelanayaan. Waxay sidoo kale muujinaysaa in Camden ay u heellan tahay tayada iyo gaaridda heerka sare ee daryeelka.

### **XEERASHA TAYADA MACHADKA NICE WAXAA KU JIRA 5 BAYAAN:**

1. Daryeeleyaasha waxaa soo ogaanaya ururrada caafimaadka iyo daryeelka bulshada waxaana lagu dhiirrigelinayaa in ay aqoonsadaan kaalimahooda iyo xuquuqdooda.
2. Daryeeleyaasha waxaa laga taageeraa in ay si firifircoo uga qaybqaataan go'aan gaarista iyo qorshaynta daryeelka loogu talagalay qofka ay daryeelaan.
3. Daryeeleyaasha laga qaadayo qiimaynta daryeelahay ayaa fursad loo siiyaa in ay ka hadlaan waxa iyaga ugu muhiimsan, oo ay ka mid yihiin baahiyaha caafimaadka, wanaaggabka iyo daryeelka bulshada, iyo shaqada, waxbarashada, ama tababbarka iyaga gaar u ah.
4. Daryeeleyaasha waxaa si joogto ah fursad loogu siiyaa in ay xirfadleyaasha caafimaadka iyo daryeelka bulshada kala hadlaan qiimaha ay leedahay in nasasho laga qaato daryeelidda iyo fursadaha iyaga diyaar u ah.
5. Daryeeleyaasha waxaa nidaamyada shaqada taageerada leh ugu baaqa ama u soo bandhiga goobaha shaqada.

Kawnsalka Camden ayaa abuurayey qaabka waxqabadka cabbiraadda wanaaggabka ee Nolosha Fiican ee Camden (Good Life Camden). Qaabkan waxqabadka waxaa wada abuuray degganeyaasha iyo kawnsalka. Waxaa lagu muujiyey waxa ay ka dhigan tahay in nolol fiican loogu noolaado Camden gudaheeda iyo sida taas loo cabbiri karo. Wuxuu ku dhisan yahay 9 mawduuc: Caafimaadka; Sinnaanta; Badbaadada; Guryeynta; Waxbarashada cimridhererka; Xiriirada bulsheed iyo beesha; Deegaanka; Awoodsiinta iyo waddananimada; Dakhliga iyo qiimaha jaban.

Waxaa jira calaamado ama seenyaaleyaal iyo cabbirro badan oo la xiriira mawduucyadan, kuwaasoo la astayn karo oo la hagaajin karo. Waxaa loo arkaa in qaabka waxqabadku uu muhiim u yahay Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha. Tusaale ahaan, Sinnaanta: qof walba waxuu heli karaa adeegyada ay u baahan yihiin; Xiririka bulsheed iyo beesha: dadku waxay dareemaan in ay ka tirsan yihin xaafaddooda, ay aaminaan deriskooda, oo ay gargaar weydiisan karaan. Cabbirrada saxda ah waxaa looga heshiin doonaa Guddiga Iskaashiga Daryeeleyaasha Xaafadda. Marka la isticmaalo qaabkan waxqabadka, qroshaha waxqabadka ayaa Kawnsalka iyo shuraakada kale ka caawin kara in ay siyaado u fahmaan waayaha daryeeleyaasha.

Sidaas darteed waxaa lagu talinayaa in aan isticmaalno xeerarka tayada machadka NICE iyo qaabka waxqabadka Nolosha Fiican ee Camden (Good Life Camden) si aan u cabbirno horumarkayaga iyo hammadyadayada si aan u xaqijino in daryeeleyaasha la qiimeeyo oo la taageero. Horumarka kuwan laga gaaro ayaa looga warbixin doonaa Guddiga Iskaashiga Daryeeleyaasha ee Camden.

Waxaa noo suurtogelin doonta in aan fahanno horumarka aan ka gaarno fulinta xeerarka iyo cabbirrada kalee natijjada, iyo soo gurista caddaynta, oo lagu sameeyo habab qiyaseed iyo sidoo kale habab tayeed, oo tusaale ahaan loo maro soo gurista xogta ee aan samayno, la hadlidda daryeeleyaasha iyo isticmaalka fulinta waxqabadyada ku jira qorshaha.

## Taageerada loogu talagalay daryeeleyaasha jooga Camden

**"Waqtiga aniga iigu cabsi badan daryeеле ahaan waa marka qofka aan daryeelo uu gargaар u baahan yahay."**

### Camden Carers (Daryeeleyaasha Camden)

Camden Carers ayaa daryeeleyaasha 18 jir ah ama ka weyn ka taageerta in ay sii wadaan kaalintooda daryeelka oo ay ilaaliyaan ama wanaajiyaaan wanaaggabka guud. Daryeеле kasta oo jooga Camden, ama daryeеле taageera qof ku nool Camden, ayaa heli kara adeegyada Daryeeleyaasha ee Camden.

<https://www.camdencs.org.uk/>

[info@camdencarers.org.uk](mailto:info@camdencarers.org.uk)

020 7428 8950

**Camden Carers ayaa ku deeqa adeegyo noocyo badan si ay u taageeraan daryeeleyaasha oo ay ka mid yihiiin:**

- Macluumaadka, talada iyo qareenimada xataa talada takhasus leh ee loogu talagalay caafimaadka maskaxda, waxbarashada naafada, asaasaqa iyo daryeeleyaasha qaangaarka da' yar (18-25).
- Qiimaynada daryeelahaa ee qaunuuniga ah (wadahadallada) iyo dib u eegisyada lagu sameeyo magaca Kawnsalka. Camden Carers ayaa qabta wadahadallada daryeelahaa marka qofka la daryeelo uusan qaadanin adeegyada Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka.
- Baaritaannada Caafimaadka iyo Habnololeedka/Baarista caafimaadka.
- Codsashooyinka deeqda loogu talagalay daryeeleyaasha shakhsiyeed oo laga helo maalbixiyeyaa kalduwan.
- Hawlahaa ama maawelooyinka daryeeleyaasha u fiican matalan, kooxda farshaxanka, socodyada, qorista hal abuurka leh, jimicsiga yoga.
- Kooxaha daryeeleyaasha oo ay ka mid yihiiin Isutagga Daryeeleyaasha Madowga ah, kooxda daryeeleyaasha Caafimaadka Maskaxda, kooxda Daryeeleyaasha Naafada Waxbarashada iyo kooxda daryeeleyaasha waayeelka/ Daryeeleyaasha Asaasaqa.
- Kulannada tababbarka daryeelahaa.
- Munaasabado kalduwan oo loogu talagalay ama ku saabsan daryeelyaasha.
- Taageerada shaqada ee loogu talagalay daryeeleyaasha.
- Nasashooyinka degdegga ah ee laga helo daryeelidda.
- Adeegga latalinta ama caqliselinta (8 lataliyeyaa, ayaa latalin ku deeqa maalin walba).
- Adeegyada maalinta asaasaqa - ku deeqa hawlo wadajir ah oo loogu talagalay daryeeleyaasha iyo qofka ay daryeelaan.
- Doodaha/Fooramyada daryeeleyaashu hoggaamiyaan, Codka Daryeeleyaasha Camden (Camden Carers Voice).
- Shaqo khaas ah oo lagu taageero Daryeeleyaasha Qaangaarka Da' yar.



## Mobilise

Mobilise waa baaq internetka ugu diyaar ah daryeeleyaasha, oo lagu bixiyo taageero iyo adeegyo. Daryeeleyaasha ayaa lala xiriirin karaa bulsho daryeeleyaal ah oo la heli karo 24 saacadood maalintii. Daryeele kaste ayaa heli kara adeegyada Mobilise. Waxay baaq xooggan u hayaan daryeeleyaasha ku nool Camden, ama daryeeleyaasha taageera qof ku nool Camden.

<https://www.mobiliseonline.co.uk/camden>

### Adeegyada ay daryeeleyaashu ku deeqaan waxaa ka mid ah:

- Minbar bulsho oo lagu wada xiriiryo daryeeleyaasha oo iskugu yimaadda meel nabad ah oo lagu helo taageerada dadka isku faca ah iyo wadaagista khibrda.
- Bar intarnet oo lagu bixiyo macluumaad iyo khayraad ku saabsan mawduucyo kaladuwan oo la xiriira daryeelka.
- Munaasabado maqal iyo muuqaal oo ay ka mid yihii kulannada Cuppa ee wax lagu cabbo oo lagu qabto barnaamijka Zoom iyo wadahadallo gole oo si firfircoon loogu wada hadlo.
- Warside toddobaad walba iimayl lagu diro oo ay ku jiraan hageyaal iyo maqaallo iyo weliba waxyaabaha ugu door roon maxalliga, munaasabadaha iyo hawlahama maawelooyinka oo loogu talagalay Camden.
- Wicisyo taageero shakhsiyeed oo la heli karo 7 maalmood toddobaadkii xataa wiikeendiyada.
- Khayraad ama ilo ay daryeeleyaashu kala xiriiri karaa Camden gudaheeda: sida ururrada ku deeqa kaarasha sicir dhimista daryelaha; sida loo sameeyo qorshaha degdegga.
- Kaaliyaha Mobilise (Mobilise Assistant), agab otomaatig ah oo diyaar u ah in uu ka jawaabo xaalandaha daryelaha 24 saac/7 maalin
- Agabyo dhijital ah oo kaladuwan oo si fudud loo isticmaali karo si loogu taageero dhaqaalah, dheefaha iyo caqabadaha caadiga ah.
- Taageero shakhsiyaysan, oo otomaatig ah oo ka hordeg ah oo lagu bixiyo iimayl
- Waxaa taageera koox ka kooban takhasusleyaasha taageerada daryelaha oo bixiya taageero shakhsiyeed, maaraynta bulshada, habaynta iyo kormeerka dhawritaanka.

## Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka

**020 7974 4444** oo dheh 'Adult Social Care' marka laguu sheego.

<https://forms.office.com/e/rdAcC2Wsxe>

Daryeele ahaan waxaad qiimaynta daryelaha (wadahadalka) ka codsan kartaa waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka. Waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka ayaa tan qaban doonta haddii qofka aad taageerto uu adeegyadooda helo, tusaale ahaan waxay helaan daryeelka guriga. Haddii qofka aad daryeesho aanan laga garanayn dhanka waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka, markaa Camden Carers (Daryeeleyaasha Camden) ayaa adiga kula shaqayn doonta si tan loo qabto.

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka haddii aad u baahan tahay gargaar iyo taageero dheeraad ah si aad ugu noolaato nolol caafimaad leh oo madaxbannaan.

Waxaa laga yaabaa in aad taageero uga baahato waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka haddii:

- aad qabto naafanimada maqalka ama aragga oo saameeya noloshaada maalinlaha ah
- aad qabto naafanimo jirka ah
- Waxaa laga yaabaa in aad rabto in aad taageero ka hesho waxyaabaha ay ka mid yihii:
  - isku xiridda waxa ka socda bulshada maxalligaaga
  - xiriirro aad la samaysato ama la joogteyso saaxiibbada iyo qaraabada
  - qabashada hawlahama maalinlaha ah sida daryeelka nafta, cunto diyaarinta
  - haddii aad ka walwal qabto naftaada ama qof kale

## Adeegga Naafada Waxbarashada ee Camden (Camden Learning Disability Service) (CLDS)

0207 974 3737

[CLDS@camden.gov.uk](mailto:CLDS@camden.gov.uk)

Adeegga CLDS waxuu la shaqeeyaa dadka qaba naafooyinka waxbarashada ee jooga Camden. Adeeggu wuxuu ka kooban yahay koox caafimaad iyo daryeel bulsho oo ka socda kawnsalka iyo adeegga NHS.

Daryeele ahaan waxaad codsan kartaa qiimaynta daryeelaha (wadahadalka) in aad ka hesho xirfadle daryeel bulsheed oo ka mid ah adeegga CLDS. Adeegga CLDS ayaa tan qaban doona haddii qofka aad taageerto uu helo adeegyadooda. Haddii qofka aad daryeesho aanan laga garanayn dhanka adeegga CLDS, ama taageerada ay ku helaan adeegga CLDS uu ka yar yahay 12 saacadood toddobaadkii, markaa Camden Carers ayaa adiga kula shaqayn doonta si loo qabto wadahadalka daryeelaha.

<https://www.cldsinfo.net/> ayay ku jiraan khayraad iyo fiidiyowyo badan oo waxtar leh. Waxaa ka mid ah maclummaad akhriis fudud, fiidiyowyo, iyo baro intarnet oo laga helo hawlo ama maawelooyin iyo maclummaad bilaash ah.

### **Caafimaadka Maskaxda**

Ka sokow taageerada caafimaadka maskaxda oo aad ka hesho Dhakhtarkaaga Guud (GP), waxaa jira adeegyo iyo khayraad ama ilo maxalliga ah oo kaladuwan oo taageero ka bixin kara caafimaadka maskaxda. Waxaa jira baro intarnet oo loogu talagalay caafimaadka maskaxda oo bixiya maclummaad ku saabsan Adeegyada Caafimaadka Maskaxda ee ka jira Camden:

Mental Health Camden (Caafimaadka Maskxda Camden) waa bar intarnet oo lagu hayo adeegyada taageerada caafimaadka maskaxda iyo wanaaggabka ee maxalliga ee ka jira Camden: <https://www.mentalhealthcamden.co.uk/>

Iskaashiga Caafimaadka Maskxda ee Waqooyiga London (North London Mental Health Partnership) (iskaashi cusub oo ka kooban ururka isbitaal ee Camden and Islington NHS Foundation Trust), ayaa daboola noocyoo kaladuwan ee taageerada iyo kooxaha caafimaadka maskaxda. <https://www.northlondonmentalhealth.nhs.uk/services>

### **Xulashooyika Daryeelka Camden (Camden Care Choices), waxaa ku jira maclummaad ku saabsan adeegyada takhasuska leh, oo ay ka mid yihiin:**

- Teerabiyada hadalka (IAPT) iyo taageerada dabiibka ah
- Khadadka iyo kulannada ballan la'aan ee shiddada
- Shabakado iyo kooxo taageero faceed
- Ururrada iyo hawlahaa ama maawelooyinka wanaaggabka

<https://camdencarechoices.camden.gov.uk/mental-health/where-to-get-support/>



## **Khadka daryeelka Camden (Camden Careline)**

Tignoloojiyo gargaar leh ayaa lagu sharxayaa qalabyo ama aalado noocyo badan oo dadka ka caawin kara in ay nolol madaxbannaan helaan iyagoo laga taageero ama laga caawiyo hawlahaa maalinlaha ah ee holosha.

Camden gudaheeda, tignoloojiyada gargaarka leh waxaa bixiya adeegga Khadka daryeelka Camden (Camden Careline). Qalabka iyo aaladaha diyaarka ah si fudud ayaa loo isticmaali karaa oo qaar badan waxaa lagu shaqaysiiyaa riixaanka badhan.

Tignoloojiyada gargaarka leh waxaa loogu talagalay qof kastoo raba in uu si madaxbannaan ugu noolaado guriga. Waxay gaar ahaan waxtar u leedahay dadka:

- aanan dhaqaaci karin ama aanan si fiican iskugu taagi karin lugahooda
- ka soo hooyanaya isbitaalka
- keligood meel ku nool oo dhibaatooyin ka qaba xasuusta
- dhibbaneyaal u noqday rabshadda guriga
- ku nool xaalado caafimaad oo waqtii dheer sida asaasaqa, sarcada ama suuxdinta, cudurka wadnaha, naafada waxbarashada ama jirka iyo dhibaatooyinka dareenka.

Tignoloojiyada gargaarka leh waxaad ku isticmaali kartaa gurigaaga gaarka ah, ama guryeynta hoysiin ah. Waxaa sidoo kale isticmaali kara daryeeleyaasha si loogu caawiyo in badbaadada loogu ilaaliyo dadka ay daryeelaan.

Xirfadle daryeel bulsho ayaa adiga kuu gudbin kara adeegga Khadka daryeelka (Careline) ama toos ayaad iyaga ula xiriiri kartaa::

**020 7974 1491 (xulashada 4)**

**carelinetelecadmin@camden.gov.uk**

## **Shabakadda Talada Camden (Camden Advice Network)**

Shabakadda Talada Camden waa 12 urur oo talo bilaash ah oo madaxbannaan siiya degganeyaasha Camden. Waxay gargaar ka bixiyaan waxyaabaha ay ka mid yihiin:

- Talada iyo qareenimada ama u doodista loogu talagalay dadka waayeelka ah
- Talada iyo qareenimada ama u doodista loogu talagalay dadka naafooyin qaba
- Talada iyo qareenimada ama u doodista loogu talagalay dadka da' yar ama dhallinyarada (16 ilaa 24)
- Deynta iyo lacagta
- Shaqada
- Guryeynta
- Haajiraadda/socdaalka
- Xuquuqha cayrta / gunnooyinka

**<https://www.camden.gov.uk/camden-advice-network>**

## **Ra'yicelinta ku aadan qorshaha**

Haddii aad qabto faallooyin ama su'aalo ku aadan Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha, fadlan la xiriir: **CamdenCareChoices@camden.gov.uk**





[carersactionplan.camden.gov.uk](http://carersactionplan.camden.gov.uk)

